Ku dhaqan Xafiis D.

# FAAFINTA RASMIGA AH
# الجريدة الرسمية
# OFFICIAL BULLETIN
## EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka 12aad** **Muqdisho, 17 AUGUST 2025** **Lr. 2**

**Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

**FAAFIN BIL SOO BAXA**

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar.
Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

## KOBNIIN

**BOGGA KOOWAAD**

**SHARCI**

W.M

**BOGGA LABAAD**

XEER

**BOGGA SEDDEXAAD**

**TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM**

## MARCH-JULY
# 2025

**Tariikh: 29/05/2024**

**Xeer Ra'iisul Wasaare Lr.157**

**XEERKA: XEER-NIDAAMIYAHA QIIMEYNTA IYO LASOCODKA SAAMEYNTA DEEGAANKA IYO BULSHADA**

XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
BIXID
28 MAY 2024
EXIT
OFFICE OF THE PRIME MINISTER

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Qodobka 99aad farqadaha (a), (b) iyo (e) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Warqadda summadeedu tahay **WD&IC/0122/2024** ee ku taariikheysana 05/05/2024 kuna saabsan codsi soojeedinta Wasaaradda Deegaanka & Isbedelka Cimilada.

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.18.75.05.24** ee **23/05/2024,** kuna saabsan **Xeer-Nidaamiyaha Qiimeynta iyo Lasocodka Saameynta Deegaanka iyo Bulshada** oo uu Goluhu cod aqlabiyad leh ku ansixiyay.

**Markuu tixgeliyey:** Muhiimadda uu leeyahay meel-marinta **Xeer-nidaamiyaha Qiimeynta Saameynta & Lasocodka Deegaanka iyo Bulshada.**

**Wuxuu Meel-mariyey:**

**Qodobka 1aad**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.18.75.05.24** ee **23/05/2024,** kuna saabsan ansixinta "**Xeer-nidaamiyaha Qiimeynta iyo Lasocodka Saameynta Deegaanka iyo Bulshada"** oo uu Goluhu cod aqlabiyad leh ku ansixiyay.

**Qodobka 2aad**

Waxaa Wasaaradda Degaanka & Isbeddelka Cimiladda loo igmaday in ay hirgaliso, meelmarisana Xeer-nidaamiyaha Qiimeynta iyo Lasocodka Saameynta Deegaanka iyo Bulshada.

**Qodobka 3aad**

Xeer-nidaamiyaha Qiimeynta iyo Lasocodka Saameynta Deegaanka iyo Bulshada, waxa uu dhaqan-galayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo Saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
OFFICE OF THE PRIME MINISTER

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-045-2025
TAARIIKH : 09-09-2025
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

## WASAARADDA DEGAANKA IYO ISBEDDELKA CIMILADA

# XEER-NIDAAMIYAHA QIIMEYNTA SAAMEYNTA DEGAANKA, BULSHADA IYO DABA-GALKA

Waxaa diyaarisay: Wasaaradda Degaanka iyo Isbeddelka Cimilada 2024

## Qodobka 1aad
## Magaca

Xeer-nidaamiyahan waxaa lagu magacaabaa "**Xeer-nidaamiyaha Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada**".

## Qodobka 2aad
## Qeexid

Macnaha erayada lagu isticmaalay Xeer-nidaamiyaha waxay noqonayaan sidan hoos ku xusan, hadii aan dib wax looga badelin:

**"Xeer"** waxaa loola jeedaa Xeerka Ilaalinta iyo Maareynta Degaanka 2024;

**"Falanqeyn"** waxaa loola jeedaa tijaabinta ama baarista arrin kasta, walax kasta ama hab-raac kasta oo ujeeddadu tahay in la garto waxay tahay (waxyaabaha ay ka kooban tahay), tayadeeda, iyo Saameynta ay ku leedahay qeyb kasta oo degaanka ka mid ah;

**"Beddelka Shay"** waxaa loola jeedaa eray sheegaya in shay ama walax laga tago iyadoo mid kale oo beddelkeeda ah la qaadanayo/adeegsanayo, iyadoo aan marnaba wax laga beddelayn shaqadii, tayadii iyo astaamihii shaygaas la beddelay qabanayey, kuwaasoo laga yaabo iney ku jiraan: goobta, nooca waxqabadka, naqshadeynta/qaabeynta, tiknoolajiyada, hawlaha, agabka, iwm;

**"Wasaaradda"** waxaa loola jeedaa Wasaaradda Degaanka iyo Isbeddelka Cimilada ee Xukuumadda JFS;

**"Warbixinta Daraasadda Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada**" waxaa loola jeedaa warbixinta la soo saaray dhammaadka hab-raaca daraasadda Qiimeynta Saameynta degaanka iyo bulshada ee hoos timaada Qeybta 56aad ee Xeerka iyo Xeer-nidaamiyahan;

**"Maareynta Degaanka"** waxaa ka mid ah ilaalinta iyo isticmaalka joogtada ah ee walxaha ama qeybaha kala duwan ee degaanka;

**"Qorshaha Maareynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada"** waxaa loola jeedaa dhammaan faahfaahinta hawlaha mashruuca, Saameynta, tallaabooyinka yareynta, jadwalka waqtiga, kharashka, mas'uuliyadaha iyo ballan-qaadyada la soo jeediyey si loo yareeyo Saameynta degaanka iyo bulshada ee dhammaan wejiyada mashruuca;

**"Hay'adda Hoggaamineysa"** waxaa loola jeedaa wasaarad kasta,

waax, ama hay'ad dawladeed ama hay’ad kasta oo uu sharci ku waajibiyey iney kaalin ka qaadato xakamaynta ama maareynta degaanka iyo arrimaha bulshada;

**"Tallaabooyinka Yareynta"** waxaa ka mid ah shaqooyinka injineernimada, horumarinta tiknoolajiyada, maareynta iyo dariiqooyinka iyo hababka lagu yareynayo dhinacyada taban, kuwaasoo laga yaabo iney ku jiraan khasaaraha dhaqan-dhaqaale iyo dhaqameed ee soo gaaray bulshooyinka iyo shakhsiyaadka, iyadoo kor loo qaadayo dhinacyada togan ee mashruuca;

**“Doorbid Mashruuc La’aan”** waxaa loola jeedaa doorbidid in aan la fulin mashruuc ama hawl ka mid ah;

**“Barnaamijka”** waxaa loola jeedaa ajande habaysan, ama jadwal ballan-qaadyo, hindiseyaal, qalabyo, iyo/ama hawlo sharraxaya oo hirgelineya siyaasad;

**“Mabda'a Taxaddarka ah"** waa mabda'a in haddii ay jiraan khataro waxyeello u geysanaya degaanka, ha ahaato mid halis ah ama aan laga noqon karin, la'aanta hubanti cilmiyeed oo buuxda waa inaan loo isticmaalin sabab dib loogu dhigo tallaabooyin wax-ku-ool ah si looga hortago xaalufka degaanka;

**"Mashruuc"** waxaa loola jeedaa waa hawl ama hawlo u gaar ah goob, oo ay ku jiraan kuwa siyaasad ahaan loo doortay, qorshayaasha iyo barnaamijyada kuwaasoo Saameyn ku yeelan kara degaanka;

**"Milkilaha ama Wakiilka Mashruuca"** waxaa loola jeedaa qofka soo jeedineya ama fulineya mashruuc, barnaamij ama ku hawlan ku qeexan Jadwalka kowaad ee xeer-nidaamiyahan;

**"Diiwaanka"** waxaa ku jira qoraal kasta, qoraallo, buug, qorshe, khariidad, sawir jaantus, sawir-gacmeed ama shaqo garaaf, sawir filin, qaab-yar, duubis cod, cajalad fiidiyow, rikoodh uu aqrin karo mashiin, iyo walxo kale oo dokumenti ah, iyadoo aan loo eegin qaabka ama sifaha;

**"Dib-u-eegis"** waxaa loola jeedaa hab lagu hubineyo ku filnaanta daraasadda Qiimeynta Saameynta degaanka iyo bulshada si loo hubiyo iney buuxisay shuruudaha sharciga iyo hubinta in ay gaartay heerkii laga rabay ee natiijooyinka daraasadda Saameynta degaanka iyo bulshada;

**“Baaritaan Kooban ama Daalacasho”** waxaa loola jeedaa marxaladda kowaad ee habka qiimeynta degaanka iyo bulshada, waxaana loo adeegsadaa in lagu go'aamiyo mashaariicda, siyaasadaha, qorsheyaasha ama barnaamijyada loo baahan yahay in lagu sameeyo baaritaanka degaanka iyo bulshada ee loo baahan yahay;

**"Warbixinta Baaritaanka kooban"** waxaa loola jeedaa warbixin soo koobeysa natiijada baaritaanka;

**"Lafo-gurka Arrimaha Bulshada"** waxaa loola jeedaa in la qiimeeyo ama hore loo sii qiyaaso cawaaqibka bulsho ee ka iman kara ficillada siyaasadeed ee gaarka ah ama horumarinta mashruuca oo ay ku jiraan cadaaladda bulshada iyo sinnaanta, hubanti la'aanta bulshada, wadajirka bulshada, shabakadaha bulshada iyo is-dhex-galka, heerka bulshada iyo takoorka jinsiga ku saleysan;

**"Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada ee lagu sameynayo Istaraatijiyad"** waxaa loola jeeda gorfayn iyo falanqayn arrimaha bulshada iyo xaalka degaanku ku sugan yahay si dhinacyada/meelaha wax-ka-qabashada u baahan tahay in loogaga jawaabo siyaasadaha, qorsheyaasha, iyo barnaamijyada, lana qiimeeyo xiriirada ka dhexeeya iyadoo la tixgelineyo dhaqaalaha iyo bulshada;

**“Horumar Waara”** waxaa loola jeedaa horumar daboolaya baahiyaha hadda jira, iyadoo aan la wiiqin awoodda jiilalka soo socda ay ku daboolayaan baahidooda;

**"Saameynta/dhibaatada Xuduudka ka baxsan"** waxaa loola jeedaa saameyn/dhibaatada ka baxsan xudduudaha Soomaaliya; iyo

**“JFS”** waxaa loola jeedaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

## Qodobka 3aad
## Baaxadda

1) Xeer-nidaamiyahan waxaa lagu dhaqayaa:

a) Dhammaan mashaariicda ku xusan lifaaqa Xeerka sida uu dhigayo Cutubka 11aad ee Xeerka.
b) Dhammaan mashaariicda lagu daray Jadwalka Kowaad ee

shuruucdan; iyo

c) Dayactir kasta oo weyn, kordhin, wax-ka-beddel ama dayactir aan caadi ahayn ama mashruuc kasta sida uu dhigayo Xeerku.

2) Qof kasta oo ah milkile ama wakiil mashruuc ma fulin karo mashruuc, kaasoo loo baahan yahay in la helo oggolaansho sida uu dhigayo Xeerka Ilaalinta iyo Maareynta Degaanka iyo Xeer-nidaamiyaha Qiimeynta Saameynta degaanka iyo bulshada lagu soo gebangabeeyo si waafaqsan xeer-nidaamiyahan.

3) Kormeeruhu waqti kasta oo macquul ah, wuxuu geli karaa dhul kasta, dhismo kasta si uu u go'aamiyo in mashruucu waafaqsan yahay shuruudaha Qiimeynta Saameynta degaanka iyo bulshada ee hoos yimaada Xeer-nidaamiyahan, isagoo u maraya hay'adaha amniga.

## Qodobka 4aad
## Ujeeddo

Ujeeddada Xeer-nidaamiyahani waa in la ilaaliyo nidaamka iyo shuruudaha sida ku cad qodobka 8aad ee Xeerka ee la xiriira diyaarinta, Qiimeynta, soo gudbinta, habaynta iyo tixgelinta, iyo go'aan-ka-qaadashada codsiyada oggolaanshaha degaanka ee bilaabista hawlaha ku saabsan Qiimeynta Saameynta degaanka iyo bulshada, si looga fogaado ama loo yareeyo Saameynta waxyeelada leh ee degaanka iyo bulshada, iyo si loo wanaajiyo Saameynta togan, iyo arrimaha khuseeya.

## Qodobka 5aad
## Miisaaniyadda Qiimeynta Saameynta Degaanka Iyo Bulshada

(1) Codsiga iyo kharashka socodsiinta, daraasadda iyo kharashka ra'yi-ururinta dadweynaha iyo bixinta dokumentiyada loo baahan yahay inta lagu jiro daraasadda, dib-u-eegista iyo marxalad kasta oo kale ee habka Qiimeynta Degaanka iyo Saameynta Bulshada waa inuu bixiyaa milkilaha mashruucu.

(2) Wasaaradda iyo Wasaaraddaha Degaannka ee Dawladdaha Xubnaha ka ah Federaalka (DXF) iyadoo uu kharashka bixineyo milkilaha mashruucu, waxay fulin karaan daraasado ka baxsan doorkeeda adeegga dadweynaha si ay u dhammaystiraan daraasadda, ama u soo saarto macluumaad iyo xog.

## Qodobka 6aad
## Mas'uuliyadda

1. Wasaaradda Deegaaanka iyo Isbeddelka Cimilada waa iney xiriirisaa, maamushaa oo ay kormeertaa Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada iyo Hannaanka hanti-dhawrka ee mashaariicda khatarta sare leh iyo mashaariicda xuduudaha ka baxsan si gaar ah:

a) In la sameeyo baaritaanka mashruuca la soo jeediyey;
b) go'aan ka gaaraan habka ku habboon ee macluumaadka iyo ka qeyb-galka dadweynaha;
c) Isku-dubaridka dhegaysiyada dadweynaha marka loo baahdo; iyo
d) Bixinta Oggolaanshaha ama diidmada mashruuca ka dib Qiimeynta Saameynta degaanka iyo bulshada.

2. In la sameeyo hanti-dhawr xilliyeed ee mashruuca khatarta sare leh ee la ansixiyey; iyo la-talinta milkilaha mashruuca lagala talineyo tillaabooyinka hagaajinta xaaladaha u-hoggaansanaan-la'aanta tallaabooyinka hore loo go'aamiyey.

3. Wasaaradda Degaanka ee DXF ayaa isku-dubaridi doona, maamuli doona oo kormeeri doona Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada iyo hannaanka hanti-dhawrka ee heer gobol iyo gaar ahaan:

(a) Hesho warbixin kooban oo mashruuc oo loogu talo-galay mashaariicda khatarta hoose iyo kuwa dhexdhexaadka ah;
(b) Isku-dubaridka dhegaysiyada dadweynaha marka loo baahdo;
(c) Bixinta ansixinta ama diidi karaan qoraallada mashruuca ee aan buuxin heerarka; iyo
(d) Go'aamiya haddii mashruuca la soo jeediyey uu u baahan yahay daraasad buuxda oo Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada ah oo aan ahayn warbixin mashruuc oo kooban sababtoo ah saameynta uu ku leeyahay degaanka;

4. Shirkadda sameyneysa Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshadu waa iney kala shaqeysaa Maamulka Nidaamka Qiimeynta Saameynta Degaanka Bulshada (Heerka Federaalka iyo Gobolka) waxayna si gaar ah mas'uul uga tahay:

a) Ku wargelinta milkilaha mashruuca baahida loo qabo Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada in la qabto;
b) Ku hagidda milkilaha mashruuca bixinta macluumaadka ku haboon ee fulinta nidaamka baarista; iyo
c) Diidista oggolaanshaha fulinta mashruuc kasta ka hor inta aan la bixin oggolaanshaha Qiimeynta Degaanka iyo Saameynta Bulshada iyadaoo loo marayo Maamulka.

5. Milkilaha mashruucu waa inuu-

a) Bixiyaa macluumaadka ku habboon ee loo baahan yahay baaritaanka bilowga ah ee mashruuca la soo jeediyey;
b) Ka qeyb-galka shirka gogol-dhiga;
c) Bixinta dokumentiyada baaritaanka rasmiga ah iyo kan dadweynaha;
d) iney bixiyaan, marxalad kasta oo mashruuca ah, xogta dadweynaha goor hore si waafaqsan talada Hay'adda ee habka ku habboon; Qaado habka loo baahan yahay ee wadatashiga dadweynaha;

6. Guddi-hawleedka Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada waa inuu sannad walba dhisaa Guddi-Hawleedka Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada heer federaal ah, Guddi-Hawleedkaasi waxa ka qeyb ahaandoona xubno matalaya xafiisyada Dawladda ee ay khusayso arrintani, Hay'adaha bulshada rayidka ah iyo qeybaha gaarka loo leeyahay.

7. Guddi-hawleedka Qiimeynta Saameynta Degaanka ee Heerka Federaalka Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada waa iney kala taliyaan Wasaaradda arrimaha farsamada ee la xiriira fulinta Qiimeynta degaanka iyo Saameynta dhigayo Xeerku, iyo sharciyada kale ee khuseeya, gaar ahaana waa iney ku jiraan: siduu:

a) dib-u-eegista iyo ka talinta hababka fulinta ee Qiimeynta Saameynta degaanka iyo bulshada iyo usoo jeedinta talooyinka Wasaaradda;
b) dib-u-eegis iyo ka talinta hab-raacyada uu agaasinku u soo saaro milkileyaasha mashaariicda;
c) dib-u-eegis iyo tala-bixin ku saabsan daraasaddha Qiimeynta Saameynta degaanka iyo bulshada, iyo warbixinaha hanti dhawrka;

d) Tixgelinta isku dhacyada iman kara ee ka dhalan kara shuruudaha u tartamidda kheyraadka degaanka;
e) Ku talinta mudnaanta xakameynta degaanka iyo bulshada, iyo tallaabooyinka maaraynta in la meel mariyo inta lagu guda jiro fulinta mashaariicda la soo jeediyey;
f) Ka talinta iswaafajinta siyaasadda Qiimeynta Saameynta degaanka iyo bulshada iyo siyaasadaha wadaagaha/tubta khayraadka dabiiciga ah iyo degaanka;
g) La-talinta iyo ka-talo-bixinta hababka lagu hubineyo isgaarsiinta waxtarka leh ee khuseeya degaanka iyo arrimaha bulshada ee la xiriira mashaariicda horumarineed si kor loogu qaado ka qeyb-galka qeybaha badan iyo dadweynaha ee hirgelinta siyaasadda degaanka;
h) Ka qeyb-qaadashada dhegaysiga dadweynaha ee la xiriira qaadashada ama wax-ka-bedelka habka Qiimeynta Saameynta degaanka iyo bulshada ee Soomaaliya; iyo kala talinta Maamulka wixii arrimo kale ah ee la xiriira Qiimeynta Saameynta degaanka.
i) Guddi-hawleedku waa inuu diyaariyaa oo uu u gudbiyaa Wasaaradda warbixin-sannadeedka waxqabadkiisa.
j) Shirarka Guddi-hawleedka ee la qabto mar kasta oo loo baahdo, waa in la qabanqaabiyo iyadoo lala tashanayo Wasaaradda.
k) Guddi-hawleedku wuxuu asaasi karaan Guddiga Qiimeynta Degaanka iyo Saameynta Bulshada, Guddi-hawleedku waxay dooran karaan xubin kasta oo ka mid ah shaqaalaha Wasaaradda ama qof kasta oo kale oo ay u aragto iney lagama maarmaan u yahay haboonaanta hawl-qabadkeeda.

l) Dawladdaha xubinta ka ah federaalka si ay u gutaan mas'uuliyadahooda waxay soo saarayaan warbixinno ku saabsan mashruuca iyagoo bixineya tallooyinka lagama-maarmaanka u ah fulinta mashaariicda khatarta hoose/dhexe ee hoos yimaada xeer-nidaamiyahan.

## QEYBTA LABAAD

## XOGTA KOOBAN EE MASHRUUCA

## Qodobka 7aad
## Sameynta iyo Gudbinta Xogta Kooban ee Mashruuca

(1) Milkile ama wakiil kasta oo fulineya mashruuca ah nooca B - khatar hoose iyo Khatar dhexdhexaad Mashruucyadda leh, ee Jadwalka kowaad ee Xeer-nidaamiyahan waa iney diyaariyaan xogta kooban ee mashruuca oo ay u gudbiyaan Wasiirka Dawladdaha xubinta ka ah Federaaalka, kaas oo qaabilsan degaanka. Marka la qorayo xogta kooban ee mashruuca waxaa la'isticmaalayaa Jadwalka saddexaad ee Xeer-nidaamiyaha.

(2) Marka la diyaarineyo xogta kooban ee mashruuca, milkiluhu ama wakiil ku waa inuu ugu yaraan hal shir la yeeshaa dhinacyada uu saameeyey iyo bulshooyinka ee ay ka mid yihiin haweenka, dhallinyarada, dadka naafada ah iyo kooxaha kale ee nugul si ay ugu sharraxaan mashruuca, saameyntiisa bulsho, dhaqaale iyo degaan, iyo in la helo faallooyin hadal ama qoraal ah oo ku saabsan mashruuca la soo jeediyey, waana in lagu lifaaqaa caddaynta ka qeyb-galka dadweynaha ee warbixinta mashruuca oo leh diiwaanka xaadiriska oo saxiixan, ajendihii shirka, hadal-qoraalka iyo sawirro. Ogeysiiska shirka waa in la sheego ugu yaraan todoba (7) maalmood ka hor qabsoomidda kulanka.

(3) Xogta mashruuca oo kooban waa inuu diyaariyaa khabiir (khubaro) u diiwaan gashan Qiimeynta degaanka iyo bulshada sida ku cad Xeer-nidaamiyahan.

(4) Codsiga shatiga Qiimeynta Saameynta degaanka iyo bulshadu waa inuu ahaadaa foomka 1aad sida ku cad Jadwalka Labaad ee Xeer-nidaamiyahan, codsaduhuna waa inuu u soo gudbiyaa maamulka codsi oo ay la socdaan ugu yaraan saddex nuqul oo daabacan iyo nuqul elektaroonik ah oo xogta kooban ee mashruuca ah.

## Qodobka 8aad
## Codsi Faallo Ka Dhiibashada Xogta Kooban ee Mashruuca

1) Haddii qoraalka kooban ee mashruucu waafaqsan yahay shuruudaha Xeer-hoosaadka, Wasiirku waa in uu shan (5) maalmood gudahooda ka dib marka uu helo warbixinta mashruuca u soo diraa nuqul ka mid ah qoraalka kooban Hay'adahan soo socda si uu u helo faallooyin qoraal ah afar iyo toban (14) maalmood gudahood laga bilaabo maalintii la helay

xogta mashruuca

a) Mid kasta oo ka mid ah Hay'adaha Hogaanka ah ee ay khusayso; iyo
b) Guddiyada Qiimeynta Saameynta Degaanka ee ay Khusayso marka ay habboontahay.

(2) Marka la helo faallooyinka lagu sheegay xeer-hoosaadka 8 (1) ee sare ama haddii aan wax faallooyin ah la helin dhammaadka muddada kow iyo labaatanka (21) maalmood ee laga bilaabo taariikhda la helo xogta mashruuca, Wasiirka Dawladdaha xubinta ka ah Federaaalka ayaa sii wadi doona inuu go'aamiyo qoraalka kooban ee mashruuca.

## Qodobka 9aad
## Diiwaanka Go'aanka Xogta Kooban ee Mashruuca

(l) Marka la go'aamiyo qoraalka kooban ee mashruuca, go'aanka Wasiirada dawlad-goboleedyda xubnaha ka ah federaalka, oo ay weheliyaan sababaha, waa in lagu wargeliyaa milkilaha/wakiilka soddon (30) maalmood gudahooda maalintii lasoo gudbiyey xogta mashruuca.

(2) Maamulku waa inuu eegaa xogta kooban ee mashruuca, iyadoo la raacayo hagayso shuruudaha baarista ee ku xusan Jadwalka saddexaad ee Xeer-nidaamiyahan

(3) Ka dib marka la eego si waafaqsan Xeer-nidaamiyaha, Wasiirka Dawladdaha xubinta ka ah Federaaalka waa inuu soo saaraa qoraal/isgaarsiin rasmi ah oo tilmaamaysa in mashruucu;

a) U baahan yahay soo gudbinta Daraasadda Saameynta Degaanka iyo Bulshada (sida hoos timaada qeybta III ee Xeer-nidaamiyahan) in sidoo kale loo gudbiyo mashruuca xafiiska Wasaaradda;
b) In loo baahan yahay gudbinta macluumaad dheeri ah.
c) la oggolaaday oo la siiyey shati; marka mashruucu aanu wax Saameyn ah ku yeelan doonin degaanka, ama in xogta kooban ee mashruucu ay shaaca ka qaado talaabooyinka yaraynta khatarta oo ku filan
d) Ama in la diiday Haddii Wasiirka dawlad-gobaleedka uu ogaado in mashruucani yeelan doono Saameyn la taaban karo oo degaanka iyo bulshada ah ama uusan waafaqsanayn siyaasadda ama

sharciyada dhaqan-gal ka ah, soo-bandhigiyaasha waxaa laga filayaa iney tixgeliyaan ama doortaan beddel kale oo ka habboon.

(4) Milkilaha/wakiilka mashruuca, hadii aanu ku qanacsanayn go'aanka Wasiirka dawlad-gobaleedka ee diidmada codsiga qoraal mashruuc ah, waxa uu qaadan karaa afartan iyo shan (45) maalmood gudahooda rafcaan go'aanka, si waafaqsan qodobka 51aad ee Xeer-nidaamiyahan.

---

## QEYBTA SADAXAAD
## DARAASADDA QIIMEYNTA SAAMEYNTA DEGAANKA IYO BULSHADA
### Qodobka 10aad
### Ururinta Xogta Muhiimka Ah Iyo Diyaarinta Arjiga Faahfaahinta Shaqada Daraasadda Saameynta Degaanka Iyo Bulshada

(1) Daraasadd Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada waa in loo qabtaa dhammaan mashaariicda khatarta sare leh ee hoos ku xusan - nooca Mashruuca 'B' Jadwalka Kowaad ee Xeer-nidaamiyahan.

(2) Milkilaha/wakiilka mashruucu waa in uu adeegsadaa koox khubaro ah si ay u qabtaan Daraasadda Qiimeynta Degaanka iyo Bulshada oo ay ku jiraan warbixinta ururinta xogta ee muhiimka ah iyo arjiga faahfaahinta shaqada, iyadoo lala tashanayo Wasaaradda ka hor inta aan la bilaabin Daraasadda.

(3) Warbixinta ururinta xogta muhiimka ahi waa iney qeexdaa baaxadda daraasadda Saameynta Bulshada Degaanka ee uu fulineyo milkilaha/wakiilku, waana in lagu daraa arjiga faahfaahinta shaqada, kaas oo tilmaamaya arrimaha muhiimka ah ee lagu wajahayo daraasadd Qiimeynta Saameynta degaanka iyo bulshada.

(4) Arjiga faahfaahinta shaqada ee Daraasadda Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada ee kor lagu sheegay waa iney ahaadaan ugu yaraan si waafaqsan shuruudaha lagu tilmaamay Jadwalka Saddexaad ee Xeer-nidaamiyahan.

### Qodobka 11aad
### Kooxda Khubarada Ah ee Qabanaya Daraasadda Qiimeynta Saameynta Degaanka Iyo Bulshada

(1) Milkilaha/wakiilka waa in ka dib marka la ansixiyo warbixinta ururinta xogta muhiimka ah iyo arjiga faahfaahinta shaqada, oo uu usoo xushay koox khubaro ah oo ka kooban koox karti leh oo diiwaangashan oo ah khubaro Qiimeynta degaanka iyo bulsheed aqoon u leh loona oggolaaday si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan Jadwalkiisa Shanaad si loo fuliyo Daraasadda Qiimeynta Degaanka iyo Saameynta Bulshada.

(2) Daraasad kasta oo Qiimeynta Degaanka iyo Saameynta Bulshada waa in uu kormeero khabiir hurmuud u ah oo diiwaangashan sida waafaqsan shuruudaha lagu qeexay Jadwalka Shanaad ee Xeer-nidaamiyahan.

(3) Qofka sameynaya Daraasadda Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada waa inuu u dhaqmaa si waafaqsan anshaxa khubarada - Jadwalka Shanaad ee Xeer-nidaamiyahan.

## Qodobka 12[aad]
## Sameynta Warbixinta Qiimeynta Saameynta Degaanka Iyo Bulshada

(1) Warbixinta daraasadda Qiimeynta Degaanka iyo Saameynta Bulshada ee lagu diyaariyey si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan waa iney tixgelisaa degaanka, bulshada, dhaqanka, dhaqaalaha, sharciga, amniga iyo caafimaadka.

(2) Nuxurka warbixinta daraasaadka Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada waa iney ugu yaraan u hoggaansamaan macluumaadka Daraasadda Qiimeynta Degaanka iyo Saameynta Bulshada ee ku xusan Jadwalka Saddexaad ee Xeerarkan.

## Qodobka 13[aad]
## Ka Qeyb-galka Dadweynaha

(1) Inta lagu jiro daraasadda Qiimeynta Degaanka iyo Saameynta Bulshada, milkilaha/wakiil ku, waa inuu raadiyaa aragtida dadka uu Saameynayo mashruuca Isaga/iyada oo qaadaya talaabooyinkan hoos ku xusan:

(a) Qabashada ugu yaraan saddex (3) kulan dadweyne ama tirada lagu go'aamiyey arjiga faahfaahinta shaqada ee la ansixiyey si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan, iyadoo dhinacyada ay khusayso iyo bulshooyinka

ay ka mid yihiin dhalinyarada, dadka naafada ah iyo kooxaha kale ee jilicsan lagu kulmiyo goob ku habboon oo ay iman karaan, iyo luqad ay fahmi karaan daneeyeyaasha kala duwan in lagu sharxo mashruuca iyo saameyntiisa iyo iney helaan faallooyinkooda oo qoraal ah ama oraah ah;

(b) Hubinta in ogaysiisyada ku habboon ee tilmaamaya taariikhaha, waqtiyada iyo goobaha shirarka, loo bandhigo bulshooyinka ay khusayso iyo dhinacyada kale ee danaynaya ugu yaraan afar iyo toban (14) maalmood ka hor shirarka lagu sheegay qodobka (a) ee kor ku xusan;

(c) Ku dhejinta boorarka goobaha istaraatijiga ah ee dadweynaha iyo agagaarka goobta mashruuca la soo jeediyey ee ogeysiinta dhinacyada ay saameeyeen iyo bulshada mashruuca la soo jeediyey;

(d) Hubinta in xusuus qorka shirarka dadweynaha in lagu lifaaqo warbixinta daraasadda Qiimeynta Saameynta degaanka iyo bulshada;

## Qodobka 14aad
## Soo-gudbinta Warbixinta Daraasadda Saameynta Degaanka Iyo Bulshada

Milkilaha/wakiil ka mashruuca waa inuu u soo gudbiyaa shan (5) nuqul oo qabyo qoraal ah daraasadda Saameynta degaanka iyo bulshada wasaradda si loogu sameeyo dib-u-eegis gudaha ah oo bilow ah si loo hubiyo iney ku habboon tahay dib-u-eegis dadweyne oo ballaaran.

## Qodobka 15aad
## Dib-u-eegista Daraasadd Saameynta Degaanka Iyo Bulshada

(1) Agaasinku waa inuu dib-u-eegis ku sameeyaa qabyo-qoraalka daraasadda Saameynta degaanka iyo bulshada, ka dibna sameeyaa faallo qoraal ah soddon (30) maalmood gudahood laga bilaabo maalinta la helo.

(2) Haddii ka dib marka dib-u-eegis lagu sameeyo qabyo-qoraalka daraasadda Saameynta degaanka iyo bulsheed uu Agaasinku ku qanco inuu dhammaystiran yahay, milkilaha/wakiil ka waa in lagu logeysiiyaa qoraal soddon (30) maalmood gudahooda laga bilaabo maalinta la helo.

(3) Marka warbixinta daraasaadka Qiimeynta degaanka iyo bulshada lagu ogaado aysan ku filnayn, Agaasinku waa inuu dib ugu celiyaa milkilaha/wakiil si uu dib-u-eegis ugu sameeyo, isaga/iyada oo tixgelineya/sa faallooyinka iyo diidmada Wasaaradda.

## Qodobka 16aad
## Martiqaadka Faallooyinka Dadweynaha

(1) Milkilaha/wakiilka mashruuca waa inuu qaab-qoraal ah ku martiqaadaa dadweynaha iney fikradahooda ka dhiibtaan qabyo-qoraalka daraasadda Saameynta degaanka iyo bulshada muddo labaatan (20) maalmood oo shaqo ah gudahood marka ay ka helaan ogeysiis oggolaansho Wasaaradda.

(2) Martiqaadka uu dadweynaha u fidineyo milkilaha/wakiilka mashruuca waa in lagu faafiyaa tebin heer qaran ah gaar ahaan wargeysyada iyo idaacadaha si waafaqsan waqtiga uu agaasinku qeexay.

(3) Casuumadda milkilaha/wakiilka mashruuca ee dadweynaha waa iney tilmaantaa:

(a) Nooca mashruuca iyo goobta;

(b) Saameynta xun ee iman karta iyo saameynta togan ee mashruuca;

(c) istaraatiijiyadaha yaraynta ee la soo jeediyey si looga jawaabo Saameynta xun; iyo muddada dib-u-eegista iyo xarumaha;

(d) Ogeysiiska waafaqsan Xeer-nidaamiyahan waa inuu ahaadaa qaabka lagu qeexay Foomka 6aad ee ku xusan Jadwalka Labaad ee Xeer-nidaamiyahan.

## Qodobka 17aad
## Dib-u-eegista Faallooyinka Dadweynaha

(1) Agaasinku waa in uu labaatan (20) maalmood gudahood ka dib marka uu helo faallooyinka dadweynaha u diraa nuqullo ka mid ah qabyo qoraalka daraasadda Saameynta bulsho ee degaanka iyo faallooyinka ay dadweynuhu ka bixiyaan xubin kasta oo ka mid ah guddi-hawleedka ee Qiimeynta Saameynta degaanka iyo bulshada si ay dib ugu eegaan oo ay faallo uga bixiyaan.

(2) Guddi-hawleedka Qiimeynta Saameynta Degaanka waa iney ku shiraan labaatan (20) maalmood oo shaqo gudahood markay helaan

qabyo-qoraalka iyo dhammaan faallooyinka si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan oo ay go'aan ka gaaraan.

## Qodobka 18aad
## Gundhigga Go'aan Ka Qaadashada Shatiga Qiimeynta Degaanka Iyo Saameynta Bulshada

(1) Marka la sameynayo go'aan ku saabsan daraasadda Saameynta degaanka iyo bulshada ee waafaqsan Xeer-nidaamiyahan, agaasinku waa inuu ku xisaabtamaa:

a) Inta lagu kalsoonaan karo saadaasha lagu sameeyey daraasadda Saameynta degaanka iyo bulshada

b) Aragtida dadweynaha ee lagu sameeyey Xeer-nidaamiyahan;

c) Falanqaynta Saameynta dhaqan-dhaqaale iyo dhaqan ee mashruuca;

d) Ku filnaanta talaabooyinka yareynta ee la soo jeediyey iyo degaanka iyo qorshaha maamulka bulshada; iyo

e) Dhinacyo kale oo loo arko iney muhiim yihiin oo khuseeya mashruuca Wasaaradda.

(2) Agaasinku waa in uu go’aan ka gaaro si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan sodon (30) maalmood oo shaqo gudahooda laga bilaabo taariikhda daraasadda la gudbiyey.

## Qodobka 19aad
## Go'aanka Wasaaradda

(1) Agaasinku isagoo tixgelineya dhammaan habka dib-u-eegista waa inuu:

a) Ansixiyo mashruuca; isagoo bixineya oggolaansho ku-meel-gaarka ah ee ku salaysan caddaymaha la bixiyey;
b) U baahan in mashruuca dib loo habeeyo oo ay ku jirto in tiknoolajiyada kala duwan ama goob kale la doorto;
c) Dib-ugu-celiyo mashruuca ama qeyb ka mid ah - milkilaha/wakiilka halka aanay macluumad ku filan ku jirin, si daraasaad dheeraad ah loogu sameeyo ama soo gudbinta macluumaad dheeraad ah, oo ay ku jiraan degaanka iyo maamulka bulshada iyo qorshaha kormeerka, si loogu fududeeyo in agaasinku u gaaro go’aan; iyo
d) iney diido mashruuca.

(2) Go'aanka Wasaaradda iyo sababaha sida waafaqsan Xeer-nidaamiyaha waa in lala socodsiiyaa milkilaha iyo wakiilka mashruuca afar iyo toban (14) maalmood oo shaqo gudahooda.

## Qodobka 20aad
## Shuruudaha Ansixinta Mashruuca

Marka la gaarayo go'aanka lagu ansixineyo mashruuca, agaasinku isagoo la tashanaya guddiga hawl-gelinta heer federaal waa inuu:

(a) Bixiyaa oggolaansho ku xiran shuruudaha ay u aragto lagama maarmaan;
(b) Sheegaa muddada ay ansixintu shaqeynayso; iyo

(c) Bixiyaa shatiga oggolaanshaha mashruuca qaabka ku jira foomka 2aad ee Jadwalka Labaad ee Xeer-nidaamiyahan.

## Qodobka 21aad
## Burinta Ansixinta

(1) Agaasinku wuxuu awood buuxda u leeyahay in uu burriyo shahaadada uu hore u bixiyey amaba ansixiyey marka:

a) Ay jirto u hogaansanaan la'aanta shuruudaha ku xusan shatiga oggolaanshaha degaanka iyo bulshada;

b) Marka ay jirto wax-ka-bedel la taaban karo oo lagu sameeyo fulinta ama hawl-galka mashruuca taasoo keeni karta saameyn xun oo degaanka ah;

c) Meesha ay jirto Saameyn la taaban karo oo aan loo baahnayn lana sii ogayn waqtigii ansixinta.

(2) Ku xadgudubka qodobka 20aad, wuxuu sababi karaa burrin degdeg ah haddii uu:

(a) ka tanaasula sheegashada/cabashada iyo sii wadidda qiimeynta iyo dib-u-eegista nidaamka hoos yimaada Xeer-nidaamiyahan; iyo

(b) Ka-noqoshada, macluumaadka loo gudbiyey Qiimeynta iyo joojinta nidaamka dib-u-eegista ee hoos yimaada Xeer-nidaamiyahan.

# QEYBTA AFARAAD
# QIIMEYNTA DEGAANKA IYO BULSHADA EE ISTARAATIIJIYADDEED

## Qodobka 22aad

## Daraasadda Istaraatijiyadda ee Degaanka iyo Qiimeynta Bulshada

(1) Agaasinku waa inuu go'aamiyaa baahida loo qabo Qiimeynta Istaraatijiyadeed ee Degaanka iyo Bulshada si loo tixgeliyo welwelka ay bulshadu ka qabto degaanka, Siyaasadda, Qorshayaasha, ama Barnaamijyada, iyagoo tixgelineya sida xiriirka ula leeyihiin dhaqaalaha iyo bulshada.

(2) Ujeedooyinka Istaraatijiyada Qiimeynta Degaanka iyo Bulshada waa iney:

a) Si loo bixiyo go'aan qaadasho xog-ogaalnimo ku dhisan iyadoo la aqoonsanayo ficillada la soo jeediyey ee Saameynta degaanka, sidoo kale la tixgelineyo beddelka ugu wanaagsan ee la taaban karo iyo aqoonsiga tallaabooyinka yareyn kara dhibaato dhici karta;

b) iney gacan ka geysato horumarinta degaan ka: odoroska iyo ka hortagga Saameynta degaanka bar-bilowga, in goor hore laga digo khataraha iyo dejinta ilaalinta degaanka oo ku salaysan mabaadi'da horumarka waara;

c) Si kor loogu qaado joogtaynta siyaasadda, barnaamijka iyo qorshaha ee qeybaha kala duwan, iyo marka ay khusayso, si cad loo sameeyo is-dhaafsiga ama is waafajinta ujeedooyinka qeybaha kala duwan;

d) Ka qeyb qaadataa dejinta siyaasadaha iyo barnaamijyada buuxineya waajibaadka heshiisyada degaanka ee caalamiga ah;

e) Sameynta isla xisaabtanka degaanka ee wakaaladaha gaarka ah si loo yareeyo waxyeelada degaanka ee ka imaanaya qeybaha kala duwan;

f) Hubinta tixgelinta mabaadi'da degaanka ee muhiimka ah oo ay ka mid tahay ka qeyb-galka dadweynaha, sinnaanta jiilaalka, mabaadi'da ka hortagga iyo mabda'a ah in Wasakheeyuhu uu sameeyo adeegyo horumarineed iyo siyaasado maareynaya qashinka, si loo sameeyo qorshayaasha horumar waara.

g) iney gacan ka geysato hufnaan iyo furfurnaan xagga go'aan gaarista iyada oo loo marayo ka-qeyb-gal dhinacyo badan leh inta geeddi-socodku socdo.

(3) Tallaabooyinka loo marayo Istaraatijiyadda Qiimeynta Bulshada Degaanka waa:

a) Baaritaanka (go'aaminta in loo baahan yahay Daraasadda iyo in kale);

b) Xakamaynta (go'aaminta baaxadda arrimaha degaanka iyo arrimaha bulshada ee ay daboosho Daraasaddu);

c) Diyaarinta qabyo-qoraalka warbixinta istaraatiijiyadda degaanka iyo bulshada;

d) Fulinta wada-tashiga iyo tixgelin ra'yiga dadweynaha ee qabyo qoraalka warbixinta Qiimeynta Istaraatiijiyadeed ee Degaanka iyo Bulshada;

e) Ku daridda tixgelinta degaanka ee qorshaha ama barnaamijka;

f) faafinta macluumaadka go'aanka (Bayaanka Qiimeynta Istaraatiijiyadeed ee Degaanka iyo Bulshada).

## Qodobka 23aad
## Soo Gudbinta Uu Milkiluhu/Wakiilku Ku Soo Gudbineyo Siyaasadda, Qorshaha Ama Barnaamijka Kooban

1) Qiimeynta Istaraatiijiyadeed ee Degaanka iyo Bulshada waa inuu fuliyaa/hor kacaa soo jeediyuhu, isaga/iyada oo la wadaagaya/sa xogta loo baahan yahay Wasaaradda si ay go'aan u gaarto.

2) Agaasinku waa inuu todoba (7) maalmood gudahood ku gaarsiiyaa natiijada baarista soo-jeediyaha:

3) Natiijooyinka baaritaanka:

   a) Qiimeynta Istaraatiijiyadeed ee Degaanka iyo Bulshada oo buuxda ama dhamaystiran ayaa loo baahan yahay;

   b) Daraasad dheeri ah ayaa loo baahan yahay si loo go'aamiyo baahida Qiimeynta Istaraatiijiyadeed ee Degaanka iyo Bulshada; iyo

   c) Qiimeynta Istaraatijiyadeed ee Degaanka iyo Bulshada looma baahna.

## Qodobka 24aad
## Soo Gudbinta Iyo Ansixinta Warbixinta Ururinta Xogta Muhiimka Ah

(1) Agaasinku waa inuu kula taliyaa soo-jeediyaha ama milkilaha siyaasadda, qorshaha ama barnaamijka inuu sameeyo xog-ururin ku saabsan xogta muhiimka ah iyadoo ujeeddadu tahay qeexidda baaxadda mawduuca iyo goobta (juquraafiga), iyadoo gebogebadu noqonayso in lagu talo-bixiyo in loo baahan yahay Qiimeynta Degaanka Istaraatijiga ah ee waafaqsan Xeer-nidaamiyahan .

(2) mas'uulka soo jeediya siyaasadda, qorshaha ama barnaamijka waa inuu doortaa khabiirka ama khubarada hoggaamiya Qiimeynta degaanka iyo bulshada ama shirkad khubaro ah oo uu shati siiyey Agaasinku si ay u sameeyaan daraasadda oganshaha baaxadda.

(3) Soo-jeediyaha Siyaasadda, Qorshaha ama Barnaamijku waa inuu diyaariyaa warbixinta ururinta xogta muhiimka ah oo uu u gudbiyo ugu yaraan saddex (3) nuqul Wasaaradda si loo ansixiyo.

(4) Agaasinku waa inuu dib-u-eegis ku sameeyaa warbixinta ururinta xogta muhiimka ah ee la soo gudbiyey oo uu ka faa'iidaysto diiwaanka go'aanka si loo ansixiyo ama u codsado macluumaad dheeraad ah muddo kow iyo labaatan (21) maalmood oo shaqo gudahood ah, laga billaabo taariikhda la soo gudbiyey warbixinta ururinta xogta muhiimka ah.

## Qodobka 25aad

## Diyaarinta Warbixinta Istaraatijiyadda Qiimeynta Degaanka Iyo Bulshada

Qofka soo-jeediya siyaasadda, qorshaha ama barnaamijka waa inuu iyadoo u adeegsanayo khubarada Qiimeynta degaanka iyo arrimaha bulshada sameeyaa daraasadda oo ay diyaariyaan warbixinta qabyo-qoraalka ah ee Istaraatijiyadeed ee Degaanka iyo Qiimeynta Bulshada marka ay ansixiyaan Agaasinku warbixinta Ururinta Xogta Muhiimka ah. Nuxurka Qiimeynta Istaraatijiyadeed ee Degaanka iyo Bulshada waa iney ka kooban tahay waxyaabahan soo socda:

1. Sharaxaadda qorshaha, wuxuu sharaxaa xiriirka ka dhexeeya qorshayaasha iyo barnaamijyada kale ee khuseeya.
2. Sharaxaadda xaaladaha degaan iyo bulsho ee hadda jira, arrimaha iyo sida ay u horumarin lahaayeen qorshaha la'aantiis.
3. Yoolka, Ujeeddooyinka, asbaabta.
4. Wax yaalaha bedelka u noqon kara qaar kale ama hawlaha kale ee Siyaasadda, Qorshaha ama Barnaamijka; iyo qorshaha fulinta iyo waqtiga.

5. Is la jaanqaadka Qiimeynta u nuglaanshaha isbeddelka cimilada, tallaabooyinka dhibaatada lagu yaraynayo iyo u adkaysiga mudnaanta leh.
6. Aqoonsiga Saameynta suurtogalka ah ee qorshayaasha ama barnaamijyada la soo jeediyey.
7. Yaraynta Saameynta la taaban karo ee laga yaabo in laga helo qorshayaasha ama barnaamijka la soo jeediyey.
8. kormeerka/lasocod ka Saameynta muhiimka ah ee laga yaabo in laga helo qorshayaasha ama barnaamijka la soo jeediyey
9. Soo koobid aan farsamo ahayn oo si kooban u qeexaysa daraasadda iyo natiijooyinkeeda.

## Qodobka 26aad
## Wada-tashiga iyo Ka-qeyb-galka Dadweynaha

1. Mas'uuliyiinta siyaasadda soo jeediyey, qorshaha ama barnaamijka waa iney la tashadaan Dawlad Goboleedka ay khusayso, hay'adaha u idman, daneeyeyaasha muhiimka ah iyo xubnaha dadweynaha inta lagu jiro dhammaan geeddi-socodka Qiimeynta Istaraatijiyadeed ee Qiimeynta Degaanka iyo Bulshada.

2. La-tashiga iyo ka-qeyb-galka dadweynuhu waa iney si isdaba-joog ah u dhacaa, dhammaan geeddi-socodka Qiimeynta Istaraatijiyadeed oo ay ugu muhiimsan tahay inta lagu jiro baaritaanka, ururinta xogta muhiimka ah iyo go'aan-qaadashada.

3. Hubi in ogeysiiska kulanka la soo diray ugu yaraan afar iyo toban (14) maalmood oo shaqo ka hor shirka iyo in goobta, taariikhda iyo waqtiga shirku ku habboon yahay dhammaan.

4. In la qabto ugu yaraan saddex (3) shirar dadweyne oo lala yeesho daneeyeyaasha iyo bulshooyinka ay khusayso si loo fahmo siyaasadda, qorshaha ama barnaamijka soo-jeediyaha iyo Saameynta ay ku leedahay, iyo in la helo faallooyinkooda oo hadal iyo qoraal ah.

## Qodobka 27aad
## Soo-gudbinta Qoraalka Qabyada Ah ee Warbixinta Qiimeynta Degaanka Iyo Bulshada

1. Siyaasadda, Qorshaha ama barnaamijka mas'uulka qaabilsani waa inuu u soo gudbiyaa Wasaaradda ugu yaraan shan (5) nuqul oo

daabacan ama sida uu dalbado Agaasinku waqtiyada qaar iyo hal (1) nuqul elektroonik ah oo ah warbixinta qabyo qoraalka ah ee Qiimeynta degaanka oo ay la socoto soo gudbinta Foomka 1aad ee ku xusan Jadwalka Saddexaad ee Xeer-nidaamiyahan.

2. Agaasinku waa in uu afar iyo toban (14) maalmood oo shaqo gudahooda ah laga bilaabo maalinta la soo gudbiyo warbixinta qabyo qoraalka ah uu ku sameeyo dib-u-eegis gudaha ah si loo ogaado ku filnaanta warbixinta qabyada ah.

## Qodobka 28aad

## Martiqaadka faallooyinka warbixinta qabyada ah ee qiimeynta Istaraatijiyadda degaanka iyo bulshada

1) Agaasinku waa inuu todobo (7) maalmood gudahood ku go’aamiya ku filnaanshiyaha sida waafaqsan Xeer-nidaamiyahan, uu u soo diro nuqullada warbixinta qabyada ah ee Wasaaradda Degaanka ee heer Dawlad-gobaleed iyo guddiyada Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada ee heer Dawlad-gobaleed ee ay khusayso, guddiga heer federaal ee Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada halka ay khusayso, hay’adaha hogaamiya iyo daneeyeyaasha kale faallooyinkooda.

2) Markay helaan warbixinta qabyada ah, Wasaaradda Degaanka ee heer Dawlad-gobaleed iyo guddiyada heerka Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada ee heer Dawlad-goboleed, guddi hawleed heer federaal ah oo Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada ah, hay'adaha hogaamineya iyo daneeyeyaasha kale waa iney dib-u-eegis ku sameeyaan oo soo gudbiyaan aragtidooda shan iyo afartan (45) maalmood gudahooda ama waqtigii uu Agaasinku u qabtay.

3) Agaasinku waa inuu toddobo (7) maalmood gudahooda ka dib marka la go'aamiyo ku filnaanshiyaha, waa inuu:

   a) ku daabaco ogeysiis ku saabsan warbixinta qabyada ah ee Qiimeynta degaanka ee siyaasadda, qorshaha ama barnaamijka laba wargays oo ka soo baxa dalka, laba usbuuc oo midkiiba ay u dhaxayso usbuuc iyo faafinta idaacadaha ka baxa dalka oo dhan ugu yaraan hal mar todobaadkii laba todobaad oo isku xigta oo dadweynaha lagu martiqaado iyo daneeyeyaasha kale ee ay khusayso iney soo gudbiyaan faallooyin qoraal iyo hadal ah siday u kala horreeyaan;

b) agaasinku waa inuu ku daabacaa nuqulka qabyo qoraalka ah ee Qiimeynta istaraatiihiyadda degaanka mareegaha Wasaaradda inta lagu jiro nidaamka ka Qeyb-galka dadweynaha; iyo

c) dadweynuhu waxay ra'yigooda ugu soo gudbin karaan Wasaaradda shan iyo afartan (45) maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda daabacaadda ugu horreysa ee ogaysiiska ee martiqaadka faallooyinka dadweynaha.

## Qodobka 29aad
## Ku-daridda Faallooyinka Qabyo-qoraalka Qiimeynta Istaraatijiyadda Saameynta Degaanka Iyo Bulshada

1. Markay helaan oo ay dib-u-eegaan faallooyinka Wasaaraddaha Degaanka ee Dawlad-goboleedka, guddiyada Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada ee heer Dawlad-goboleed iyo guddi hawleedka heer federaal ee Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada, hay’adaha hogaamineya, xubnaha dadweynaha iyo daneeyeyaasha kale, Agaasinku waa in marka uu falanqeeyo faallooyinka u soo diro mas'uulka siyaasadda. , qorshaha ama barnaamijka iyadoo ujeeddadu tahay in lagu daro warbixinta qabyada ah ee Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada.

2. Faallooyinka ka soo baxa Wasaaradda ay khuseyso Degaanka ee Gobolka, guddiyada Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada ee heer gobol iyo guddi-hawleedka heer federaal ee Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada, hay’adaha hoggaamineya, xubnaha dadweynaha iyo daneeyeyaasha kale, waa in lagu daraa siyaasadda, qorshaha ama barnaamijka soo-jeedinta gudaha lixdan (60) maalmood laga bilaabo taariikhda Codsiga Wasaaradda oo u soo gudbiyo saddex (3) nuqul oo daabacan iyo hal (1) nuqul elektaroonik ah oo ah warbixinta Qiimeynta Istaraatijiga ah ee dib-u-eegay Agaasinku.

3. Marka la helo oo la xaqiijiyo warbixinta qabyada ah ee Qiimeynta istaraatijiyadeed ee dib loo eegay, Wasaaradda isagoo la tashanaya mas’uulka siyaasadda, qorshaha ama barnaamijka, waxay qaban qaabin doontaa aqoon-isweydaarsiga ansixinta soddon (30) maalmood gudahooda oo ay ku lug leeyihiin dhammaan daneeyeyaasha ujeeddada ansixinta nuxurka iyo ku filnaanta warbixinta qabyada ah ee dib loo eegay Qiimeynta Degaanka iyo Bulshada.

## Qodobka 30aad
## Soo-gudbinta Warbixinta Qiimeynta Degaanka iyo Bulshada ee u dambeysa

Marka la isku daro dhammaan faallooyinka, taageeraha siyaasadda, Qorshaha, ama barnaamijka waa inuu warbixinta ugu dambeysa ee qiimeynta degaanka iyo istaraatijiyadeed ee ay soo gudbiyaan shan (5) nuqul oo daabacan oo ah warbixinta qiimeynta Istaraatijiyadeed ee ugu dambeysa ee degaanka iyo bulshada ama sida uu Agaasinku u arko waqtiyada qaar iyo hal (1) koobbi elektroonik ah oo ay la socoto foom si sax ah loo buuxiyey ee 1aad ee lagu sheegay Jadwalka Labaad ee Xeer-nidaamiyahan.

## Qodobka 31aad
## Diiwaan-gelinta Go'aanka Warbixinta Qiimeynta Istaraatijiyadda Degaanka iyo Bulshada

1) Marka dib-u-eegis lagu sameeyo warbixinta Qiimeynta istaraatijiyadda ee u dambeysa ee degaanka iyo bulshada, Agaasinku waa inuu ku bixiyaa Qorshaha Diiwaanka Go'aanka ama Barnaamijka soddon (30) maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda la soo gudbiyo warbixinta ugu dambaysa ee Qiimeynta degaanka iyo bulshada ee hoos timaada Xeer-nidaamiyahan.

2) Haddii ay dhacdo in diiwaanka go'aanka Qorshaha ama Barnaamijku la ansixiyo/oggolaado, agaasinku waa inuu u soo bandhigaa mas'uulka Qorshaha ama barnaamijka oggolaansho shuruuda leh.

3) Haddii ay dhacdo in warbixinta qiimeynta degaanka iyo bulshada ee ugu dambeysa ee la soo gudbiyey lagu sheego mid aan lagu qancin, agaasinku waa inuu soo saaraa ogeysiis qoraal ah oo sheegaya iney warbixintu kala dhimman tahay oo u baahan mas'uulka qorshaha iyo barnaamijka iney u hoggaansamaan talooyinka Wasaaradda.

4) Dhanka Siyaasadda, agaasinku waa inuu soo diyaariyaa qoraal kooban soddon (30) maalmood gudahooda una gudbiyaa Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS.

5) Nuxurka qoraalka kooban waa inay ku jiraan kuwa soo socda iyo kuwa kale:
    a) magaca siyaasadda iyo mas'uulka/soo-jeediyaha;
    b) hordhac kooban oo ku saabsan Siyaasadda;

c) ujeedooyinka siyaasadda iyo caddaymaha;
d) habka istaraatijiiyadda Qiimeynta degaanka iyo bulshada oo kooban;
e) arrimaha muhiimka ah ee degaanka, bulshada, dhaqaalaha dhaqanka iyo Saameynta;
f) bedelka wanaagsan;
g) kala-sarreynta doorarka kale;
h) ganacsi, dib-u-dejin iyo magdhow; iyo
i) gunaanadka iyo talooyinka siyaasadda.

5. Xafiiska Ra’iisul Wasaaraha ee u xilsaaran Siyaasadda ayaa horgeyn doona Baarlamaanka si loo ansixiyo.

## Qodobka 32aad
## Kormeerka iyo Qiimeynta Siyaasadda, Qorshaha ama Barnaamijka

1) Kormeerka iyo Qiimeynta, waxay wanaajisaa xiriirka ka dhexeeya fara-gelinta siyaasadda natiijooyinkooda iyo Saameyntooda, waxay kor-u-qaadaysaa la xisaabtanka iyo siyaasadaha waxtarka iyo waxtarka leh ee wax-ka-qabashada arrimaha degaanka, bulshada, dhaqaalaha iyo dhaqanka.

2) Mas'uulka/soo-jeediyaha Siyaasadda, Qorshaha ama Barnaamijku waa inuu mas'uul ka yahay dhammaan arrimaha Kormeerka iyo Qiimeynta oo u soo gudbiyaa warbixinnada Kormeerka iyo Qiimeynta Wasaaradda laba iyo tobankii biloodba mar (12) ama sida uu u arko lagama maarmaan agaasinku waqtiyada qaar agaasinku waa inuu si rasmi ah u qiimeeyaa natiijooyinka Kormeerka iyo Qiimeynta gudaha soddon iyo lix bilood (36) ama sida laga yaabo inuu agaasinku u arko iney lagama-maarmaan u tahay waqtiyada qaar iyadoo ku xiran xaaladda siyaasadda, qorshaha ama barnaamijka.

3) Agaasinku waa inuu kormeeraa kormeerka iyo Qiimeynta Siyaasadda iyadoo taageero farsamo ka helaysa Guddi-hawleedka Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada ee heer Federaal ah iyo Wasaaraddaha Degaanka ee Dawladdaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka iyo Guddida Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada ee heer dawlad-goboleed hadii loo baahdo.

## QEYBTA SHANAAD
## HANTI-DHAWRKA DEGAANKA IYO BULSHADA

## Qodobka 33aad
## Hanti-dhawreyaasha Degaanka iyo Bulshada

Qof ma sameyn karo hanti-dhawrka degaanka iyo bulshada ilaa qofkaas si sax ah loo cadeyey oo loo diiwaan-geliyey si waafaqsan qodobka 46aad ee Xeerka Maaraynta Degaanka (Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada), 2024.

## Qodobka 34aad
## Mabaadi'da Aasaasigaa ee Hanti-dhawrka Degaanka iyo Bulshada

Qabashada hanti-dhawrka Degaanka iyo Bulshada waa in lagu saleeyaa mabaadi'dan soo socota:

a. Waxaa qabta shakhsi ama shirkad shahaado lagu siiyey oo ka diiwaan-gashan xafiiska Wasaaradda, si waafaqsan Xeerka Degaanka iyo Bulshada (Qiimeynta Saameynta, iyo hanti-dhawrka), 2024 waxaana loo fulineyaa si xirfadaysan; iyo

b. mas'uulka/soo-jeediyaha mashruucu wuxuu ku qasban yahay inuu ilaaliyo oo uu dheelitiro xaalada/awooda degaanka iyo horumar waara.

## Qodobka 35aad
## Hanti-dhawrka Degaanka iyo Bulshada

1) Dhammaan mashaariicda suurtagal ka ah inay saameyn xun ku yeelan karaan degaanka iyo bulshada waa in lagu sameeyaa hanti-dhawr degaanka iyo bulshada oo ku saleysan hagaha/hab-raaca Wasaaradda.

2) Mas'uulka/soo-jeediyaha mashruucu waa inuu ku sameeyaa hanti-dhawrka bilowga ah ee degaanka iyo bulshada muddo aan ka yarayn hal (1) sano oo aan ka badnayn saddex (3) sano ka dib marka la dhammeystiro ama la bilaabo mashruuca.

3) Mas'uulka/soo-jeediyaha waa inuu qabto hanti-dhawr ku salaysan Qiimeynta khatarta. Mashruucyada khatarta yar ee hoos yimaada mashruuca nooca B ee Jadwalka Kowaad ee la qabanayo saddexdii (3) sanoba mar, mashaariicda khatarta sare leh ee hoos timaada Mashruucyada Nooca A ee Jadwalka ugu horreeya oo la sameeyo laba iyo toban (12) biloodba mar, Haddii nolosha/muddada mashruucu ka gaaban tahay waqtiga aan kor ku soo xusnay,waxaa laga yaabaa in hanti-dhawrka loo baahdo si dhakhso ah, agaasinku waxa uu u

baahan karaa baaris kale oo ku xiga hanti-dhawrka hore haddii loo arko lagama maarmaan.

4) Hanti-dhawrka hore ee degaanka iyo bulshada waa iney fuliyaan Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada iyo khabiir ku takhasusay hanti dhawrka oo uu ansixiyey agaasinku.

5) Hanti-dhawrka degaanka iyo arrimaha bulshada ee la cayimay waa in lagu sameeyaa iyadoo oo la raacayo arjiga faahfaahinta shaqada ee Agaasinku ansixiyey ee Wasaaradda.

## Qodobka 36aad
## Diyaarinta Warbixinta Hanti-dhawrka Degaanka iyo Bulshada

1. Warbixinta hanti-dhawrka degaanka iyo arrimaha bulshada waa in la diyaariyaa iyadoo la raacayo tilmaamaha guud ee hanti-dhawraha degaanka iyo bulshada kaas oo madax u noqon doona koox hanti-dhawrayaal ah.

2. Isbeddel kasta oo ku yimaadda baaxadda shaqada inta lagu jiro diyaarinta warbixinta degaanka iyo hanti-dhawrka waa iney ku heshiiyaan dhinacyada hanti-dhawrka degaanka iyo bulshada.

## Qodobka 37aad
## Qabashada Hanti-dhawrka Saameynta Degaanka iyo Bulshada

1. Qabashada hanti-dhawrka degaanka iyo bulshada waa inay ku jirto isticmaalka waydiimo la diyaariyey, booqashada goobaha degaanka, falanqaynta iyo tijaabada falaqaynta si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan, qeybaha Warbixinta hanti-dhawrka Degaanka iyo Bulshada waa iney waafaqdaa shuruudaha loo dejiyey sida ku cad Jadwalka Afraad ee Xeer-nidaamiyahan.

2. Hanti-dhawraha degaanka iyo bulshada waa inuu:
   a) marka kowaad talada ku darsado faahfaahinta mashruuca;
   b) caddeeya ujeedada mashruuca, baaxadiisa iyo shuruudaha hanti-dhawrka;
   c) inuu u hoggaansamo sharciga degaanka ee qaranka iyo kan caalamiga ah iyo qaab-dhismeedka sharci ee caafimaadka iyo

badbaadada iyo isticmaalka joogtada ah ee kheyraadka dabiiciga ah;

d) xaqiijiyaa heerka u hoggaansanaanta mas'uulka/soo-jeediyaha mashruuca ee shuruudaha lagu dejiyey qorshaha maamulka degaanka iyo bulshada;
e) qiimeeyaa wacyiga milkilaha/horumariyaha, aqoonta iyo mas'uuliyadda ku aaddan ku dhaqanka sharciyada khuseeya;
f) dib-u-eegaa dokumeentiyada mashruuca ee la xiriira dhammaan kaabeyaasha dhaqaalaha iyo nashqadeynta si loo hubiyo ujeeddada ilaalinta degaanka iyo ka hortaga waxyeelo kasta;
g) baaraa barnaamijyada la socodka, hal-beegyada, iyo hab-raacyada loo dejiyey xakamaynta iyo sixitaanka tallaabooyinka degdega ah;
h) baaraa diiwaannada dhacdooyinka iyo shilalka iyo suurto-galnimada mustaqbalka ee dhacdooyinka iyo shilalka;
i) isku daraa Qiimeynta u nuglaanshaha cimilada, tallaabooyinka mudnaanta leh kuwaas oo lagu yaraynayo culayska ay keentay isbedelka cimiladu iyo falalka la qabsiga isbedelka cimilada;
j) kormeeraa dhammaan dhismeyaasha, goobaha iyo deyrarka ay wax-soo-saarka, tijaabinta iyo isku socodka alaabuhu ka socdaan gudaha iyo dibadda mashruuca, iyo sidoo kale meelaha alaabta lagu keydiyo, meelaha alaabta lagu tuuro, iyo in la diiwaan-geliyo dhammaan khataraha degaanka iyo bulshada ee la xiriira arrimahan oo kale;
k) baaraa oo uu helaa aragtida kooxda mashruuca, bulshooyinka degaanka ah kooxa nugul ee goobta mashruuca iyo dadka kale ee Saameyn caafimaad ama nabad-gelyo ku yeelan karo mashruucu; iyo
l) Qiimeyaa welwelka caafimaadka iyo degaanka ee hawlihii hore iyo kuwa socda.

## Qodobka 38aad
## Qaabeynta warbixinnada Hanti-dhawraha

1) Warbixinta hanti-dhawrka degaanka iyo bulshada waa iney lahaataa qaabkan soo-socda:
   a) hordhaca kooban ee warbixinta;
   b) Xogta heerka mashruuca ee hadda;

c) Ujeeddooyinka iyo baaxadda hanti-dhawrka;
d) Hab-maamuuska hanti-dhawrka, shuruudaha iyo hababka isticmaalka;
e) Natiijooyinka iyo indho-indhaynta;
f) Sharraxaadda arrimaha muhiimka ah oo ay ku jiraan meelaha uu ku wanaagsan yahay iyo meelaha uu ku liito mashruuca;
g) Tallooyinka;
h) Gebogebada;
i) liiska dokumantiyada la isticmaalay ama lasoo xigtay; iyo
j) lifaaqyada (sawiro, Qorshe hawleedka mustaqbalka, la-talinta iyo liiska dadka ay khusayso ee lagala tashaday.)

2) Warbixinta hanti-dhawrka degaanka iyo bulshada waa inuu Saxiixa mid kasta oo ka mid ah shakhsiyaadka sameeyey hanti-dhawrka degaanka iyo bulshada.

3) Marka la dhammeeyo warbixinta daraasadda hanti-dhawrka bulshada iyo degaanka, mas'uulka/soo-jeediyuhu waa inuu soo gudbiyaa ugu yaraan shan (5) nuqul oo daabacan ama sida uu Agaasinku u oggolaado waqtiyada qaar iyo nuqul ka mid ah warbixinta oo ah qaab elektaroonig ah oo ku qoran qaabka la sheegay.

4) Marka la helo warbixinta hanti-dhawrka degaanka iyo bulshada, Agaasinku waa inuu todoba (7) maalmood gudahood ugu diraa nuqulka warbixinta:

a) dawlad-goboleedyada ay khuseyso;
b) mid kasta oo ka mid ah dhinacyada (hay'adaha dawliga ah) ee ay khusayso;
c) guddi-hawleedka heer federal,Guddiyada Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada iyo guddiga hanti-dhawrka ee heer gobol; iyo
d) marka ay wax ka badan hal Gobol ay ku lug leeyihiin, Maamulka Gobolka ee ay khusayso iyo qeybaha maareynta degaanku waa inay faallooyinkooda oo qoraal ah ugu soo-gudbiyaan Wasaaradda afar iyo toban (14) maalmood gudahood laga bilaabo maalinta ay helaan warbixinta hanti-dhawrka ee Wasaaradda.

5) Marka la helo faallooyinka ama haddii aan faallooyin la helin dhammaadka muddada kow iyo labaatanka (21) maalmood ah ee laga

bilaabo taariikhda la helo warbixinta hanti-dhawrka, Wasaaradda ayaa sii wadi doonta iney qiimeyso warbixinta hanti-dhawrka.

6) Marka agaasinku ku qanco in hawlaha mashruucu u hogaansameen qorshaha maamulka degaanka iyo bulshada isla markaana aanay jirin wax Saameyn ah oo degaan iyo bulsho ah, agaasinku waa inuu sanad walba bixiyaa shahaadada u hogaansanaanta degaanka iyo bulshada ee foomka shanaad (5) ee ku xusan Jadwalka labaad ee Xeer-nidaamiyahan shan iyo afartan (45) maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda la helo warbixinta hanti-dhawrka.

## Qodobka 39aad
## Gudbinta Warbixinta Hanti-dhawrka Degaanka iyo Bulshada

Warbixinta hanti-dhawrka degaanka iyo bulshada waa in loo gudbiyaa milkilaha ama hawl-wadeenka xarunta afar iyo toban maalmood (14) gudahood ka dib dhamaystirka hanti dhawrka.

## Qodobka 40aad
## Xakamaynta Hanti-dhawrka Degaanka iyo Bulshada

1. Xakameynta baaritaanka hanta-dhawrka degaanka iyo bulshada waa iney fuliyaan Wasaaradda mar kasta oo ay lagama maarmaan u aragto si loo hubiyo u hogaansanaanta mashruuca ee Qorshaha Maareynta Degaanka iyo Bulshada, waxaa kale oo la dammaanad qaadi karaa ka dib markii lagu guulaysto codsi qoraal ama hadal ah oo xubin dadweynaha ka mid ah u soo jeediyo si uu u sameeyo hanti-dhawrka.

2. Xakameynta hanti-dhawrka degaanka iyo bulshada waa iney xaqiijiyaan in mashruucu u hoggaansan yahay Qorshaha Maareynta Degaanka iyo Bulshada ee la dejiyey oo uu xaqiijiyaa ku filnaanshaha talaabooyinka yaraynta Saameynta xun ee degaanka.

3. Kormeerka ilaalinta degaanka iyo bulshada waa iney sameeyaan kormeerayaasha degaanka iyo bulshada.

## Qodobka 41aad
## Dalabka Hanti-dhawrka Ka dib

Guddi-hawleedka Qiimeynta Degaanka iyo Saameynta Bulshada waxa suurtagal ah iney soo saarto amar hagaajin ah oo lagu fulinayo

tallaabooyinka sixitaanka ee lagu dhimayo xaalufka degaanka ee la muujiyey intii lagu jiray daraasad kasta oo hanti-dhawr ah.

## Qodobka 42[aad]
## Kormeer

1) Kormeeraha degaanka ee sharcigu awood u siiyey, waqti macquul ah, wuxuu geli karaa dhul kasta, dhismo ama goob kasta oo mashruuc isagoo ay ujeeddadiisu tahay kormeer, si uu u baara diiwaannada iyo inuu wax ka weydiiyo mashruuca, kormeeraha degaanku wuu sameyn karaa ama sabab u noqan karaa in lagu sameeyo dhaqan-gelinta hanti-dhawrka degaanka iyo bulshada xarun kasta oo ay jirto sabab macquul ah oo lagu aamino in:
   a) hawlaha laga qabanayo xarunta waxay jebineyaan ama ay u badan tahay iney ku xad-gudbaan Sharciga ama Xeer-nidaamiyahan;
   b) dhaqdhaqaaqyada ka socda xarunta waxay u badan tahay iney keenaan khatar degdeg ah iyo waxyeello caafimaadka aadanaha, ama waxyeello aan loo baahnayn oo aan laga soo kaban karin u geystaan degaanka;
   c) ku xad-gudub sharci kasta oo kale oo la xiriira degaanka, oo aan ahayn midka lagu sheegay farqada (1) (a) ee qodobkan, ayaa dhacaya.

2) Kormeeraha degaanka waa inuu:
   a) Si waafaqsan qodobka (42) farqadiisa (1) (a) ama (b), u diraa hawl-wadeenka ama milkilaha xarunta ogeysiis qoraal ah, ugu yaraan siddeed iyo afartan (48) saacadood ka hor inta aan la sameyn hanti-dhawrka degaanka iyo bulshada; iyo
   b) Si waafaqsan qodobka (42) farqadiisa (1) (c), waa in laga dalbadaa milkilaha inuu hanta-dhawr geliyo mashruuciisa muddada la cayimay, iyadoo wargelin ku filan loo dirayo.

3) Qofka diida inuu ka jawaabo su'aalaha, diido inuu isticmaalo dokumenti ama diido inuu bixiyo macluumaad kale oo uu si sharci ah u raadiyo kormeeraha degaanku wuxuu gelayaa dembi sida ku cad sharciga.

## Qodobka 43[aad]
## Kormeerka Degaanka iyo Bulshada ee Guddi-hawleedka Heer Federaal

1. Guddi-hawleed heer federaal ah waa inay la tashadaan Wasaaraddaha Degaanka ee Dawladdaha iyo guddiyada heer gobol iyo heer faderaal ama hay'adaha kale ee ay khuseyso:
    a) la socdaan dhacdooyinka degaanka iyo bulshada iyadoo la eegayo in la sameeyo qiimeyn ku saabsan isbeddelada suurta-galka ah ee degaanka dabiiciga ah iyo saameyntooda;
    b) la socodka hawlaha warshad kasta, mashruuc ama hawl kasta iyadoo la eegayo in la go'aamiyo Saameynta dhow iyo mustaqbalka fog ee degaanka;
    c) marka laga reebo hadii daraasad barbilow ah la sameeyey, waa in milkilaha mashruuca laga dalbadaa in uu sameeyo daraasad si loogu ogaado halbeegyada aasaasiga ah ee degaanka iyo bulshada ee aagga mashruuca ka hor intaan la hirgelin;
    d) go'aamiyaan halbeegyada iyo tilmaamayaasha la cabbiri karo ee loo adeegsan doono la socodka mashaariicda; iyo
    e) in la sameeyo cabbiraadda isbeddellada degaanka ee dhacay intii lagu jiray hirgelinta mashruuca.

2. Guddi-hawleed heer federaal ah, isagoo la tashanaya Wasaaradda Degaanka ee Dawladda Federaalka iyo Dawladdaha xubinta ka ah fadaraalka ama hay'adaha kale ee ay khusayso waxay si joogto ah ula socdaan mashaariicda socda si waafaqsan hab-raacyada.

3. Guddi-hawleed heer federaal ah, marka la ogaado u hoggaansanaan la'aanta shuruudaha oggolaanshaha shahaadada daraasadda Saameynta degaanka iyo bulshada isla markiiba, waa inay bilaabaan tallaabo sixid ah.

## Qodobka 44aad
## Warbixinta Kormeerka

1) Ka dib marka la sameeyo kormeerka sida uu dhigayo qodobka 41aad ee sharciga, guddiga farsamadu waa inay u gudbiyaan warbixinta kormeerka Wasaaradda. Warbixinta waa inay ku jiraan:
    a) magaca iyo ciwaanka goobta shaqada ee milkilaha mashruuca;
    b) magaca mashruuca la soo-jeediyey;
    c) taariikhda fulinta mashruuca la soo-jeediyey;
    d) taariikhda warbixinta kormeerka ee ugu dambeysay, oo ay ku jiraan natiijooyinka warbixinta, tallaabada la qaaday iyo natiijada;
    e) faahfaahinta xuduudaha degaanka ee lagu kormeerayo sida ku qeexan Qorshaha Maareynta Degaanka;

f) natiijooyinka shaqada kormeerka dhabta ah;
g) tallaabooyin cusub ee la fulineyo oo ay ku jiraan shuruudaha Qiimeynta soo socota; iyo
h) Natiijooyinka, gunaanadka iyo tallooyinka kooban oo aan farsamo ahayn.

2) Kormeeraha degaanku wuxuu u soo gali karaa dhul kasta ama dhisme kasta si uu ula socdo saameynta hawl kasta oo laga sameeyo dhulkaas ama dhismahaas ee degaanka.

## QEYBTA LIXAAD
## QODOBBO GUUD

### Qodobka 45aad
### Arrimaha Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada ee Xuduudaha Ka Gudba

1) Marka mashruuc la filayo inuu saameyn ku yeesho xuduudaha, milkiluhu isagoo la tashanaya Wasaaradda waa inuu xaqiijiyaa in la sameeyey tallaabooyin yareyn kara oo ku habboon si looga fogaado waxyeello kasta oo imaan karta iyadoo la tixgelineyo heshiisyada jira ee u dhexeeya Soomaaliya iyo Dawladdaha kale.

2) Meesha ay u badan tahay in dhaqdhaqaaqu saameyn ku yeesho meel ka baxsan xudduudaha Soomaaliya, qiyaasidda baaxadda waa inay arrinkan muujisaa iyadoo la aqoonsanayo la Lana tashanayo dhinacyada danaynaya iyo kuwa ay khusayso ee dalalka deriska ah. Caawimaaddа laga helayo Wasaaradda Degaanka iyo Isbeddelka Cimilada waxay noqoneysaa iney raadiyaan si loola xiriiro dhiggooda dalalka deriska ah.

3) Iyadoo la-talinta guud ee bulshada ee habka lagu qeexay Xeerka Maareynta Degaanka laga yaabo ineysan ka suuroobeynin dalalka ay saameysay, waxaa suurta-gal ah in la helo fikradahooda iyadoo loo marayo dhiggooda (Wasaaradaha Degaanka iyo Isbeddelka Cimilada) ee dalalkaas. Marka la eego nidaamkan warbixinta furan ah ee loo marayo (Wasaaradaha Degaanka iyo Isbeddelka Cimilada) ayaa laga yaabaa inuu ku caawiyo.

4) Hubinta tabashooyinka ay soo-jeediyeen dalka ay dhibaatadu saameysey si waafi ah loogu wajaho arjiga daraasadda Qiimeynta Saameynta degaanka.

5) Raadinta dhammaan macluumaadka loo baahan yahay ee khuseeya dalalka ay dhibaatadu saameysey, Wasaaradda ayaa gacan ka geysaneysa.

## Qodobka 46aad
## Helitaanka Xogta iyo Arrimaha ay tahay iney Qarsoonaadaan

1. Macluumaadka ama dokumentiyada uu qof kasta u soo gudbiyo Wasaaradda ee la xiriira qeybaha (2, 3, 4, 5, iyo 6) ee Xeer-nidaamiyahan iyo go'aanka xafiiska Agaasinku gaaro waa in dadweynaha loogu baahiyaa wargeysyada gudaha ah iyo warbaahinta elektaroonigga ah labadaba si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan.

2. Qofka u soo gudbinaya macluumaad, Wasaaradda waxaa laga yaabaa inuu ka codsado Wasaaradda in macluumaadka qeyb ka mid ah ay tahay sir oo laga reebo macluumaadka loo soo bandhigayo dadweynaha iyadoo lagu saleynayo Sirta Ganacsiga Ama Danta Amni ee Qaranka.
3. Waa in xogtani ay sii ahaato mid ay heli karto Wasaaradda, agaasinkuna waa inuu qaadaa dhammaan tallaabooyinka lagu ilaalineyo sirta macluumaadka oo aan la koobiyeyn, faafin, daabicin ama shaacin macluumaadkaas.

## Qodobka 47aad
## Diiwaan-gelinta Khubarada Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada

1) Qofka codsanaya in loo diiwaan-galiyo xirfadle (Sarkaal sare, Sarkaal xigeen ama shirkad) si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan waa inuu u hoggaansamaa shuruudaha u-qalmitaanka iyo xeerka anshaxa sida ku cad Jadwalka Afaraad ee Xeer-nidaamiyahan.

2) Codsiga diiwaan-gelinta xirfadlaha waa inuu ku jiraa foomka 3aad ee lagu qeexay Jadwalka Labaad ee Xeer-nidaamiyahan.

3) Codsiga ku xusan xeerkan waa inay la socotaa kharashaadka diiwaan-gelinta sida lagu qeexay Jadwalka Afaraad ee Xeer-nidaamiyahan.

## Qodobka 48aad
## Shatiga Khubarada Qiimeynaya Degaanka iyo Bulshada

Shatiga khabiir ku takhasusay Qiimeynta degaanka iyo bulshada ee la tixraacayo waa inuu ahaadaa mid waafaqsan Foomka (1) ee ku xusan Jadwalka Labaad ee Xeer-nidaamiyahan, waxaana lagu bixin doonaa kharashaadka uu cayimay agaasinku waqtigaas.

## Qodobka 49aad
## Anshaxa Khubarada Qiimeynaya Saameynta Degaanka iyo Bulshada

1) Khubarada Qiimeynta Degaanka waa inay u dhaqmaan si xirfadeysan, sax ah, cadaalad ah iyo si aan eex laheyn u gutaa shaqadooda.

2) Khubarada Qiimeynta Degaanka iyo Bulshada oo shahaado iyo shati haysta si waafaqsan Xeer-nidaamiyaha, waxaa ay asaasi karaan urur xirfadeed si ay u taageeraan horumarinta xirfadeed oo ay ku jirto sida ku cad qeybta anshaxa- Xeer-nidaamiyahan ee Jadwalka Afaraad.

## Qodobka 50aad
## Ansixinta ama Diidmada Mashruuca

1. Wasaaradda ama qof ka socdo mas'uuliyad madani ah ama ciqaab ah, kama saarno ansixinta mashruuc ama natiijada ka timaadda mashruuca la ansixiyey, lagumana qaadi karo fal-dambiyeed madani ah ama ciqaab ah, sababtiisa tahay oggolaanshaha, diidmada, ama shardi kasta oo ku lifaaqan oggolaanshaha.

2. Xaqiijinta la xiriirta Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada ee ka difaaceysa fal kasta oo madani ah ama Dacwad ciqaab ah ama fal kasta oo hoos yimaada sharci kasta oo khuseeya mashruuca ama qaabka loo maamulay ama looga shaqeeyey.

## Qodobka 51aad
## Dembiyada

1. Iyadoo aan loo eegin shati oggolaansho lagu bixiyey si waafaqsan sharciga, qof kasta oo bilaaba, fuliya, ama dhaqan-geliya mashruuc kasta isagoo aan oggolaansho ka helin Wasaaradda sida ku xusan Xeer-nidaamiyahan, wuxuu gelayaa dembi isagoo muteysanaya ciqaabta lagu qeexay qeybtan.

2. Qofka wuxuu gelayaa fal-dembiyeed hadii uu:
    a. ku guul dareysto inuu diyaariyo oo u gudbiyo warbixinta mashruuc kooban/Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada Wasaaradaha Degaanka ee Dawlad goboleedyada

ama Wasaaradda taas oo ka soo horjeedda Xeer-nidaamiyahan;

b. ku guul dareysta inuu diyaariyo oo uu soo gudbiyo Warbixinta Daraasadda Saameynta Degaanka iyo Bulshada taas oo ka soo horjeeda Xeer-nidaamiyahan; iyo

c. jebiya shuruudaha lagu siiyay shatiga mashruuca Qiimeynta Saameynta degaanka iyo bulshada.

## Qodobka 52aad
## Rafcaan

1. Qof kasta oo:
   a) Loo diiday bixinta shatiga ama wareejinta shatiga si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan;
   b) Lagu soo rogo shuruudo ama xaddidaad ama hakin lagu sameeyo shatigiisa;
   c) La buriyo shatiga lagu bixiyey si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan;
   d) Lagu soo rogay amar dib loogu soo celiyo degaanka ama lagu horumarineyo degaanka, amarkaas oo uu bixiyey Wasaaradda Degaanka;
   e) Loo diiday ansixinta ama dib-u-celinta shatiga Qiimeynta Saameynta degaanka;
   f) Loo Diiday oggolaanshaha qorshe ama barnaamij ama in lagu soo rago xaddidaad shati ama hakin oggolaansho la bixiyey.

2. Qof kasta oo ku qanci waaya go’aanada lagu gaaray si waafaqsan faqrada (1) ee qodobkan, wuxuu rafcaan ka qaadan karaa muddo lixdan (60) maalmood gudahooda oo ka bilaabanyso taariikhda go'aanka uu go’aanka soo baxay ama lasoo gaarsiiyo, go’aanka Gudiyada Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada ee heer Fadaraal iyo Guddi-hawl-wadeenka Hanti-dhawrka.

3. Qofka go'aanka ku qanci waaya soddon (30) maalmood gudahood ka dib go'aankaa ama amarkaas, wuxuu rafcaan ka qaadan karaa go'aankaas wuxuuna cabashadiisa u gudbin karaa Guddiga Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada ee heer fadaraal iyo guddi-hawleedka hanti-dhawrka.

4. Oggolaanshaha lagu bixiyey oo la xiriirta qiimeynta saameynta degaanka uma noqoneyso difaac dacwad madani ama ciqaab ah oo uu fal-dembiyeed ka dhigayo Xeerarka Dalka.

## Qodobka 53aad
## Diiwannada

Agaasinku waa inuu ilaaliyaa diiwaannada soo socda:

a) Dhammaan diiwaannada shatiga Qiimeynta Saameynta degaanka iyo bulshada ee lagu bixiyey Xeer-nidaamiyahan;
b) Diiwaanka Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada, kormeerka, iyo hanta-dhawrka degaanka;
c) Diiwaanka oggolaanshaha codsiyada doonaya ka saarista macluumaadka gaarka loo leeyahay xogta ay dadweynuhu heli karaan;
d) Dhammaan Diiwaannada khubarada Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada ama shirkado khubaro ah oo si sharci ah loogu oggolaaday iney qabtaan ama diyaariyaan hanti-dhawrka degaanka iyo diiwaanka warbixinnada hanti-dhawrka degaanka iyo bulshada;
e) Dhammaan Dokumentiyada machadyada tababarrada ee la aqoonsan yahay ee bixiya shahaadooyin si ay u qabtaan Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada;
f) Dadweynuhu waa iney heli karaan Diiwaanadda ay hayso wasaaradda, waxayna u baari kartaa cid kasta si waafaqsan shuruudaha ay dajisay Wasaaradda.

## Qodobka 54aad
## Kaalinta Wasaaradda

Kaalinta Wasaaradda iyo Wasaaradaha Degaanka ee Dawladdaha Xubinta ka ah Federaalka ee ku aaddan dhaqan-galinta Xeer-nidaamiyaha waa:

1. Hoggaaminta Qiimeynta Degaanka iyo Bulshada ee siyaasadaha, barnaamijyada iyo istaraatijiyadaha heer Federaal ee Soomaaliya.
2. Wasaaradaha Degaanka ee Dawladdaha xubinta ka ah Faderaalka si ay u helaan xog kooban oo ku saabsan mashaariicda qeybta B (khatarta dhex-dhexaadka ah iyo kuwa yar yar) ee gudaha Gobolka.

## Qodobka 55aad
## Wareejinta ama U-idmashada Hawlaha

Wasaaraddu waxay u wareejin kartaa ama u idman kartaa hawlo kasta oo uu Xeer-nidaamiyahani jideeyey, Wasaaraddaha Degaanka ee Dawlad-goboleedyada ama waax ka tirsan wasaaradda, si ay u gutaan hawshaas.

## JADWALKA KOWAAD

**MASHAARIICDA LA DHAQAN-GELINAYO**
**QEYBTA (A)**
**MASHAARIICDA HALISTA BADAN KA DHALAN KARTO**

TILMAAN GUUD:

a) Mashaariicda sababaya in isbedel balaaran uu ku dhaco isticmaalka dhulka;
b) Qorsheyaasha heer Qaran iyo kuwa dawlad-goboleed;
c) Mashaariicda dhalan-rogeysa dhulka cagaaran ama keymaha, dhul-beereedka ku yaala magaalooyinka ee cabir kiisu ka badan yahay 20 Hektar; iyo
d) Kaabeyaasha waaweyn ee ku dhaw dhulka u nugul fatahaadda.

BEERAHA:

a) qodaalka(carageddinta) beeraha ee ka badan 100 Hectare (Ha);
b) mashaariicda horumarinta biyaha;
   (i) Baliyada ka wayn 300Ha;
   (ii) Biyo gaarsiinta ama gelinta ka badan 500 Ha;
   (iii) Fatahaadda ama daad celinta/moosidda ka badan 500 Ha;
c) gacamada (kanaallada) waraabka ee ka badan 500 Ha;
d) falidda dalaga kaligis ee ka badan 100 Ha;
e) qodaalka (carageddin) ubaxa ee ka badan 5Ha; iyo
f) hadiiba, qodaalku keenayo barakac ku dhacaysa bulshada waxaa lagama-maarmaan ah in la helo qorshaha dib-u-dejinta.

MAAREYNTA DHUL-DAAQ-SIMEEDKA IYO XOOLAHA:

a) dhaqidda xoolaha tiradoodu ka badan tahay 1000 neef; iyo
b) socodka ama geediga xoolo (Lo') ka badan 5000 neef.

KEYMAHA:

a) jarida dhirta qoriga looxa (dhirta loo beeray in looxa laga dhigo) ee ka badan 5 Ha;
b) jarida iyo farsameynta qoriga looxa iyadoo la'isticmaalayo kiimiko;
c) dhismaha wadooyinka dhex maraya kaymaha (muhiim ma aha dhererka wadadu inta uu la eg yahay);
d) banneynta iyo dhalan-roga kaymaha si loogu isticmaalo ujeedo/isticmaal kale; iyo
e) Marka dhir qalaad la rabo in lagu beero, marka la sameynayo dhirayn/ kayn dad sameeyen, la rabo in nooca dhirta ka mid ah kaynta laga dabar-jaro.

KALUUMAYSIGA:

a) beerashada/dhaqashada kaluun, sida Aargoosatada si looga ganacsado; ama

b) Warshadeynta kaluunka iyo keydintiisa ee ka badan 50 tan maalintii.

DUUR-JOOGTA:

a) dib-u-soo celinta ama beddelka noocyada cusub ee noolaha dhirta iyo xayawaanka ah;
b) dhaqashada noocyada xayawaanka; iyo
c) marka la sameynayo goobo:
   (i) xayawaanka lagu ilaaliyo laguna daryeelo;
   (ii) lagu ilaaliyo, daryeelo islamarkaana lagu daawado, aqoonna laga kororsado; iyo
   (iii) goob lagu ilaaliyo oo lagu daryeelo xawayaanka dhasha ah ee gacanta lagu dhigo, kuwaas oo aan noolaan karin hadii aanay helin daryeel iyo xanaano dheeraad ah.

HORUMARINTA GOOBAHA DALXIISKA IYO TAMASHLAYNTA:

a) dhismaha hoteelada iyo adeegyada la xiriira ee harooyinka, wabiyada, jasiiradaha iyo badaha;
b) hoteelada iyo adeegyada la xiriira ee laga dhisayo dusha sare ee buuraha; iyo
c) Horumarinta adeegyada dalxiiska iyo tamashlaynta ee dhulka seereyaasha ah amaba agagaarka seereyaasha (seere kaymeedka, seere dalxiiska, seere badeedka IWM.)

TAMARTA:

a) horumarinta habka gudbinta xoogga korontada,
b) qodidda iyo soosaarida tamarta Gaasta (LPG);
c) warshadaha tamarta kulka loogu badelo tamarta korontada, taas oo awooddeedu ka wayn tahay 50 MW;
d) Sameynta goobaha tamarta korantada lagaga dhaliyo qulqulka biyaha.
e) sameynta warshadaha tamarta ka dhaliya awooda Nukliyarka;
f) sameynta goobaha tamarta korontada lagaga dhaliyo awoodda dabeysha; iyo
g) Horumarinta nooca ama noocyada kala duwan ee tamarta la cusboonaysiiyo, kuwaas oo laga dhalineyo koronto baaxad leh.

BATROOLKA:

a) sahminta iyo horumarinta goobaha saliidda iyo gaaska;
b) dhismaha dhuumaha badda iyo kuwa barriga;
c) dhismaha iyo horumarinta ceelasha saliidda iyo gaaska, farsameynta, habeynta, maareynta iyo keydintooda;
d) dhismaha warshadaha saliida lagu sifeeyo; iyo
e) gudbinta saliida iyadoo la'isticmaalayo dhuumaha saliida qaada.

GAADIIDKA IYO WADOOYINKA:

a) dhismaha iyo/ama balaarinta wadooyinka;
b) dhismaha garoonnada diyaaradaha ee waaweyn, garoonnada diyaaradaha ee yaryar iyo adeegyada kale ee la xiriira;
c) dhismaha iyo balaarinta xadiidka tareenadu maraan; iyo
d) dhismaha iyo balaarinta dekadaha.

CUNTADA IYO CABITAANKA:

a) warshadaha Sokorta soo saara; iyo
b) warshadaha tubaakada farsameeya.

WARSHADAHA MARYAHA:

Warshadaha wax-soo-saarka dharka cudbiga, suufka iyo adeegyada kale ee la xariira sida (tolidda, falkinta, qalajinta cudbiga iyo suufka).

WARSHADAHA HARGAHA:

Warshadaha farsameeya hargaha, saamaha iyo wax-soo-saar kale ee la xiriira.

WARSHADAHA WARQADAHA IYO BUUGAAGTA:

Warshadaha soo saara warqadaha, buugaagta iyo agabka la xiriira iyadoo laga farsameynayo qoriga dhirta.

DHISMAHA IYO INJINEERIYADA:

a) goobaha warshadaha iyo goobaha degsiimada; iyo
b) horumarinta xeebaha.

WARSHADAHA KIIMIKOOYINKA:

a) soo-saarista iyo keydinta sunta cayeyaanka ama kiimikooyinka kale ee khatarta ah;
b) soo-saarists alaabta dawooyinka (Farsamo);
c) soo-saarista rinjiga;
d) soo-saarista saabuunta iyo nadiifiyeyaasha kale; iyo
e) soo-saarista carro-nafaqeeyeyaasha.

QODDIDA KHEYRAADKA:

a) Qoddida iyo sifeynta shidaalka Gaaska (LPG); iyo
b) Qoddida macdan si kooban ama si balaaranba.

WARSHADAHA KALE EE WAX-SOO-SAARA (Macdanta ahayn)

Soo-saarista shamiitada (sibidhka):

BIRRAHA IYO FARSAMEYNTOODA:

a) Soo-saarista noocyada biraha ee ay kamid yihiin (Aluminium, Copper, Lead, Nickel, Tin, Titanium and Zinc); iyo
b) Soo-saarista birta iyo xaddiidka culus.

KORONTADA IYO ELEKTOROONIKADA:
Soo-saarista beteriyada iyo dib-u-farsameyntooda.

MAAREYNTA QASHINKA IYO GOOBAHA QASHIN-QUBKA:

1. Qashinka sunta ah iyo kuwa halista ah:
    a. dhismaha goobaha qashinka lagu gubo;
    b. dhismaha warshadaha dib-u-habeynta qashinka;
    c. dhismaha warshadaha lagu sifeeyo biyaha wasakheysan ee bullaacadaha;
    d. dhismaha goobo qashin-qub oo amaan ah; iyo
    e. dhismaha goobo ku-meel-gaar ah oo qashinka lagu keydiyo.

2. Qashinka adag ee ka soo baxa magaalooyinka;
    a. dhismaha goobo qashin-qub oo lagu xabaalo qashinka adag ee ka soo baxa magaalooyinka;
    b. wasakhda dareeraha ah ee magaalooyinka; iyo
    c. dhismaha nidaamka bullaacadaha.

QEYBINTA BIYAHA:

a) qeybinta biyaha togagga iyadoo la isticmaalayo kanaalo;
b) duwidda qulqulka biyaha ee dabiiciga ah;
c) hababka biyaha looga jiito/kaxeeyo goob ilaa goob kale;
d) ka faa'iidaysiga biyaha dhulka hoose ku jira iyo kuwa dusha mara;
e) warshadaha biyaha lagu sifeeyo; iyo
f) baliyada ama biyo-xireennada.

QORSHEYNTA HORUMARINTA DHULKA, HAGAAJINTA DHULKA, GURIYEYNTA IYO GOOBAHA LA DAGAN YAHAY:

a) dhulka loo baahan yahay in dib-u-dejin lagu sameeyo;
b) sameynta xarumo/goobo qoxoonti degan yahay;
c) dhulka biyuhu fadhiyaan ama dhul biyoodka loo rogayo dhulka qalalan; iyo
d) qodidda gidaarada loogu talo-galay celinta fatahaada mowjadaha badda, jidadka dadku ku lugeeyaan, moosaska fatahaada la iskaga difaaco, saaqiyadaha (tubooyinka) biyaha qaada iyo meelaha wabiyadu ay biyaha kaga daraan badweynta.

## QEYBTA B. MASHAARIICDA HEERKA DHEXE IYO KUWA YARYAR EE AAN LAHAYN HALIS WEYN

FAAHFAAHINTA MASHAARIICDA LOO BAAHAN YAHAY

Liiska mashaariicda heer ka dhexe iyo kuwa yaryar ee u baahan in diiwaanka lagu qoro, hasayeeshee, aan u baahnayn in lagu sameeyo daraasad buuxda oo lagu ogaanayo dhibaatada ka dhalan karta. Sidoo kale, mashaariicdani uma baahna in lagu sameeyo daraasad hordhac ah iyo mid koobanba, kaliya waxay u baahan yihiin in la eego nuxurka mashruuca ka dibna, la siiyo shahaadada ansaxinta.

BEERAHA,

a) qodaal balaaran (<50 ilaa 10 Ha); (b) Mashaariicda horumarinta khayraadka biyaha;
b) qeybinta biyaha (baaxadda dhulka (<200 ilaa <50 Ha, fatahaad-celinta (baaxadda dhulka (<200 ilaa <50Ha); (iii) waraabka, saaqiyadaha (tubooyinka) (baaxadda dhulka (<200 ilaa <50), qodaal keliya oo ku fadhiya dhul balaaran (<50 Ha).
c) qodaalka ubaxa (<2 Ha).

MAAREYNTA DHUL-DAAQSIMEEDKA IYO XOOLAHA

a) dhaqidda xoolaha tiradoodu ka badan tahay (< 1000 ilaa <500 neef); iyo
b) Socodka ama geediga xoolo (Lo) ka badan (< 500 ilaa < 100 neef.

KEYMAHA

Marka la rabo in nooc dhirta ka mida keynta laga dabar-jaro.

KALLUUMAYSIGA

Warshadeynta kalluunka iyo keydintiisa ee ka yar 10 tan maalintii.

HORUMARINTA DALXIISKA IYO TAMASHLAYNTA

Booqashada dhulka baadiyaha ah, iyadoo guryo ku-meel-gaar ah goobta laga dhisanayo si loogu hoydo.

CUNTADA IYO CABITAANKA

a) habeynta tubaakada;
b) sharaabka iyo cuntada la warshadeeyey; iyo
c) kawaannada xoolaha lagu gawraco (Mashaariicda oo dhan, kuwaasoo tirada xoolaha ay qalayaan ka yar tahay).

WARSHADAHA MARYAHA

Tolliinka iyo falkinta dharka cudbiga iyo suufka ah ee ay sameynayaan qof ama dad kooban.

DHISMAHA IYO INJINEERIYADDA,

a) iskuulka ay dhiganayaan arday ka yar 360, Rug caafimaad, Xarumaha caafimaadka daryeelka hooyooyinka iyo dhallaanka;
b) riigagga; iyo
c) balliyada yaryar.

BIRAHA IYO FARSAMEYNTOODA
Goobaha gaadiidka lagu dayactiro/Geerashyada.

KORANTADA IYO ELEKTOROONIKADA
Qotominta/rakibaadda biraha isgaarsiinta iyo fidintooda.

MAAREYNTA QASHINKA IYO GOOBAHA QASHIN-QUBKA

a) qashinka qoysaska magaalooyinku soo saaraan;
b) dhiska warshadaha carro nafaqeeyeyaasha ka sameeya haraaga cuntada, caleemaha dhirta iyo digada xoolaha; iyo
c) wasakhda dareeraha ee magaalooyinka.

MASHAARIICDA SHIDAALKA LA XIRIIRA
Kaalimaha shidaalka iyo Warshadaha yaryar ee gaaska (LPG).

## JADWALKA LABAAD,
## FOOMKA QIIMEYNTA SAAMEYNTA DEGAANKA IYO BULSHADA
## FOOM KOWAAD, ISTICMAALKA

Tixraaca isticmaalka No.

XEERKA MAAREYNTA DEGAANKA

CODSI OGGOLAANSHO SAMEYN DARAASAD LAGU OGAANAYO SAAMEYNTA DEGAAN KA IYO BULSHADA KU LEEYAHAY MASHRUUC AMA QORSHE HORUMARINEED

QEYBTA, A FAAHFAAHINTA MILKILAHA MASHRUUCA

A1. Magaca milkilaha (Qof ama Shirkad) -------------------------------------------------------

A2. Lambarka boostada ---------------------------------------------------------------------------------

A3. Magaca qofka lala xiriiri karo ----------------------------------------------------------------

A4. Telefoon lambarka ------------------------------------------------------------------------------

A5. Email-ka ------------------------------------------------------------------------------------

QEYBTA B. FAAHFAAHINTA MASHRUUCA

B1. Magaca mashruuca --------------------------------------------------------------------------

B2. Ujeeddada mashruuca iyo inta uu la egyahay ama ka kooban yahay ----------------------------------------

---

B3. Faahfaahin kooban oo ku saabsan tallaabooyinka waaweyn ee mashruucu qaadayo ----------

-------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------

B4. Meesha mashruuca laga fulineyo (bedka goobta, gobolka, loolka iyo dhigta goobta mashruuca laga fulineyo) ------------------------------------------------------------------------------------------------------------

-------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------

QEYBTA C. CADEYNTA MILKILAHA MASHRUUCA AMA WAKIIL KIISA

Waxaan halkan ku caddeynayaa in xogta sare ku xusan ay saxan tahay isla markaana ay run tahay inta aan ka ogahay

Magaca: ----------------------------------------------------- mas'uuliyadda qofka hayo---------------------------

Saxiixa------------------------------------------------Wakiil ka ahay ----------------------------------------------

Taariikhda ------------------------------------------ (Magaca shirkadda iyo Shaabbadda) --------------------

QEYBTA D. FAAHFAAHINTA KHUBARADA SAMAEYNAYSA DARAASADDA/QIIMEYNTA DEGAANKA.

Magaca (Qofka ama Shirkadda) ------------------------------------------------------------------------------------

Shahaadada diiwaan-gelinta shirkadda -------------------------------------------------------------------------

Lambarka shatiga mihnadda Qiimeynta degaanka ------------------------------------------------------------

Lambarka Boostada -----------------------------------------Telefoonka ------------------------------------------

Emial-ka -----------------------------------------------------------------------------------------------------------

Mas'uuliyadda qofka -----------------------------Saxiixa-------------------------Tariikhda-----------------

QEYBTA E. WAXAA ISTICMAALI KARA KALIYA MAS'UULIYIINTA DAWLADDA EE SHAQADAN U XILSAARAN

☐ La ansixiyey ☐ Lama ansixin

Faallo.

______________________________________________

______________________________________________

______________________________________________

Magaca mas'uulka ----------------------------------- mas'uuliyadda uu hayo-----------------------------------

Saxiixa-------------------------------------------Taariikhda-----------------------

Qof kasta oo si been-abuur ah u sheega warbixin ama wax-ka-beddela warbixinta mashruuca wuxuu gelayaa dembi sida waafaqsan xeerkan.

F.G:

Fadlan soo gudbi kuwan soo socda:
(a) Saddex (3) nuqul oo foomkan ah oo si sax ah loo buuxiyey; (b) Saddex (3) nuqul oo ah warbixinta Kooban ee Qiimeynta Saameynta Degaanka uu mashruucu ku yeelan karo.

Agaasimaha Guud,
Wasaaradda Degaanka iyo Isbaddelka Cimilada,
Muqdisho, Somalia

**FOOMKA LABAAD**
**SHATIGA OGGOLAANSHAHA QIIMEYNTA SAAMEYNTA DEGAANKA IYO BULSHADA EE MASHRUUCA**

Lamberka shatiga ---------------------

Tixraaca codsiga ----------------------------------

**WAXAA ISTICMAALI KARA KALIYA MAS'UULIYIINTA DAWLADDA EE SHAQADAN U XIL SAARAN**
**XEERKA MAAREYNTA DEGAANKA**
**SHATIGA QIIMEYNTA SAAMEYNTA DEGAANKA IYO BULSHADA**

Waxaan halkan ku caddeynayaa in warbixinta Qiimeynta Saameynta Deeganka iyo Bulshada ee mashruuca ---------------- ee uu soo gudbiyey --------------------------------- (magaca qofka /ama shirkada), xarunteedu/tiisu tahay ------------------------------, warbixin taasoo loo soo gudbiyey Wasaaradda Degaanka iyo Isbadelka Cimilada, ee Dawladda Federalka Soomaaliya si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan Lr----- 2024, Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada ee Mashaaruuca. (magaca mashruuca) ----- ---------------------- ujeeddadiisu tahay in uu sameeyo ---------------------------------------------, mashruucaas oo laga fulineyo goobta------------------degmada -------------------------waa la hubiyey, waxaana la siiyey shatigan oggolaanshaha fulinta mashruuca. Waxaa la raaciyey shuruudaha ku xusan lifaaqa.
Taariikhda: --------------
Saxiixa -------------------------------------- Shaabbadda -------------------------

Ku: Agaasimaha Guud,
Wasaaradda Degaanka iyo Isbadelka Cimilada,
Muqdisho, Somalia

**FOOMKA SADDEXAAD**
**CODSIGA KHUBARADA SAMAYSA QIIMEYNTA SAAMEYNTA DEGAANKA IYO BULSHADA EE MASHRUUCA**

Tixraaca codsiga----------------

**XEERKA MAAREYNTA DEGAANKA 2024**
**CODSIGA SHATIGA MIHNADA QIIMEYNTA SAAMEYNTA DEGAAN IYO BULSHO EE MASHAARIICDA**
**QEYBTA A, FAAHFAAHINTA CODSADAHA**

A1. Magaca codsadaha (qof ama shirkad) ------------------------------------------------------------

A2. Jinsiyadda -------------------------------------------------------------------------------

A3. Haddii ay shirkadu tahay (ma wadanibaa mise waa shisheeye) ---------------------------------

A4. Lambarka diiwaan-gelinta ganacsi ee shirkadda -----------------------------------------------

A5. Lambarka Boostada -------------------------------------------------------------------------

A6. Lambarka teleefoonka ---------------------------------------------------------------------

A7. Email-ka---------------------------------------------------------------------------------

A8. Heer waxbarasho iyo khibrada codsadaha -------------------------------------------------

A9. Liiska khubarada, dhalashadooda, heer kooda waxbarasho iyo khibradooda. ---------------
------------------------------------------------------------------------------------------------------------------

A10. Takhakhuska ---------------------------------------------------------------------------

A11. Khibrada shaqo ee la xiriira Qiimeynta Saameynta degaan iyo bulsho (Jaantus geli) ------------------------------------------
------------------------------------------------------------------------

A12. Xubinnimada ururada ay ku midoobeen khubarada arrimaha degaanku ---------------------

---

A13. Codsiga shatiga shaqada lagu qabanayo (dooro meesha ku haboon)
☐ Hormuud ☐ Kaliye hormuud ☐ Shirkad

QEYBTA B, CADEYNTA CODSADAHA

Waxaan halkan ku caddeynayaa in xogta sare ku xusan ee aan bixiyey tahay mid sax ah, oo run ah inta aan ka ogahay, sidaas ayaanna aamin sanahay.

Magaca codsadaha ----------------------------------------------------------------

----------------------------------

Saxiixa codsadaha ----------------------------------------------------------------

Tariikhda -----------------------------------------

Ka wakiil ah ---------------------------------------

Magaca shirkadda iyo shaabbadda

QEYBTA C, WAXAA ISTICMAALI KARA KALIYA MAS'UULIYIINTA DAWLADA EE SHAQADAN U XIL SAARAN.

☐ La ansaxiyey ☐ Lama ansixin

Faallo

------------------------------------------------------------------------------------
------------------------------------------------------------------------------------
------------------------------------------------------------------------------------
------------------------------------------------------------------------------------
------------------------------------------------------------------------------------
----------------------------------------------------------------------------

Magaca ----------------------------------------------- Mas'uuliyada ------------------------------------------------

Saxiix ---------------------------------------------------

Taariikhda ------------------------------------------------

**FOOMKA AFARAAD, SHAHAADADA MIHNADA**

Tixraaca codsiga-----------------------------------

Lambarka diiwaan-gelinta -------------------------

XEERKA MAARAYNTA DEGAANKA 2024
SHAHAADADA MIHNADA QIIMEYNTA SAAMEYNTA DEGAAN IYO BULSHO EE MASHRUUCA

Waxaan caddeynayaa in Mudane/Marwo ---------------------------------------------oo laga helo ------------------------------------------------inuu /inay dhamaystiray/tay shuruudihii looga baahnaa ee mihnada Sameynta Qimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada ee mashruuca si waafaqsan Xeerka Maareynta Degaanka 2024. waxaanna loo oggolaaday inay/inuu qaban karo shaqada kor ku xusan, heerka -------------------------

Shahaadadani waxay shaqayneysaa laga bilaabo ----------------------------------------- ilaa ---------------
Tariikhda -----------------------------
Saxiixa -----------------------------
Agaasimaha Guud,
Wasaaradda Degaanka iyo Isbadelka Cimilada,
Muqdisho, Somalia

**FOOMKA SHANAAD**
**U HOGAANSANKA SHAHAADADA**

Tixraaca codsiga ---------------------------
Lambarka shahaadada -------------------

XEERKA MAARAYNTA DEGAANKA 2024
SHAHAADADA U HOGAANSANAANTA QIIMEYNTA SAAMEYNTA DEGAANKA IYO BULSHADA

Tixraaca codsiga -----------------------------
Tariikhda --------------------------------------
Cinwaanka ------------------------------------------------------------------------------------------------
Milkiilaha Mashruuca ------------------------------------------------------------------------------------
Wasaaradda Degaanka iyo Isbeddelka Cimilada ee Dawlada Federalka Somaliya, waxaa uu dib u eegay warbixinta, waxaanu ogaaday iney u hoggaansantay oo ay waafac san yahay shuruudaha Maareynta Degaanka (Qiimeynta Istaraatijiga, Qiimeynta Degaanka iyo Bulshada), 20--- sidaaradeed waxaa uu bixineyaa Shahaadada U hogaansanaanta Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada muddo dhan ----- oo ka bilaabanta --------- kuna eeg---------

Taariikhda --------------------------------
Saxiix ----------------------------------
Shaabbada -----------------------------

Agaasimaha Guud,
Wasaaradda Degaanka iyo Isbadelka Cimilada,
Muqdisho, Somalia

Shuruudo sugnaanta shahaadada.

1. Waa in la hubiyaa in si buuxda loogu hogaansamo qorshaha maareynta degaanka ee ay soo jeedisay warbixinta baarista degaanku.

2. Wasaaradda Degaanka iyo Isbeddelka Cimilada ee Dawladda Federaalka Soomaaliya waxaa uu leeyahay awood buuxda uu kaga xayuubiyo ama ku tirtiro shahaadada la bixiyey haddii loo hogaansami waayo shuruudaha iyo xeerarka saldhiga u ah ay ku jirto, Xeerka Maaraynta Degaanka 2024 iyo Xeer-nidaamiyahan.

**FOOMKA LIXAAD**
**OGEYSIIS FAALLOOYINKA DADWEYNAHA**
**XEERKA MAAREYNTA DEGAANKA 2024**
**OGEYSIINTA DADWEYNAHA SIDII AY U SOO GUDBIN LAHAAYEEN FAALLOOYINKA KU SAABSAN WARBIXINTA QIIMEYNTA SAAMEYNTA DEGAANKA IYO BULSHADA**

Iyadoo la raacayo Xeerka Maareynta Degaanka 2024 iyo Xeer-nidaamiyahan (Qiimeynta Degaanka iyo Saameynta Bulshada), Wasaaradda Degaanka iyo Isbadelka Cimilada waxaa loo soo gudbiyey warbixinta Qiimeynta Saameynta degaanka iyo bulshada ee mashruuca la fulinayo ---------------------------------------------------------

Faahfaahinta Mashruuca ----------------------------------------------------------------------------------------

---

Mashruuca laga fulinayo degmada----------------------------------------- --Saameynata mashruuca ee la saadaaliyey waxaa ka mid ah -------------
-------------------------------------------------------------------------------
-------------------------------------------------------------------------------
-------------------------------------------------------------------------------
-------------------------------------------------------------------------------
-------------------------------------------------------------------------------
-------------------------------------------------------------------------------
-----------------------------------
(Si kooban u sharax Saameynta mashruucu ee la filayo inuu yeesho iyo tallaabooyinka la qaadayo si loo yareeyo)-----------------------------------
-------------------------------------------------------------------------------
-------------------------------------------------------------------------------
-------------------------------------------------------------------------------
-------------------------------------------
Warbixinta dhamaystiran ee mashruuca la soo jeediyey waxaa laga eegi karaa sida hoos ku xusan saacadaha shaqada,

1. Xarunta guud ee Wasaaradda Degaanka iyo Isbadelka Cimilada
2. Xafiisyada Wasaaradda ee Maamul-goboleedyada
3. Website ka Wasaaradda : http://www.decc.gov.so/

Wasaaradda Degaanka iyo Isbadelka Cimilada waxay dadweynaha ka codsaneysaa inay ka soo ra’yi dhiibtaan hab-qoraal soddon (30) maalmood gudahood oo ka bilaabanaysa maalinta ogaysiiskan la baahiyey, kuna soo hagaajiyaan.

1. Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Degaanka iyo Isbaddelka Cimilada
2. Xafiisyada heer Maamul-goboleed

Taariikhda --------------------------------------------

Saxiixa -----------------------------------------------

Agaasimaha Guud,
Wasaaradda Degaanka iyo Isbaddelka Cimilada,
Muqdisho, Somalia

## JADWALKA SADDEXAAD
## HAGE GUUD OO KU SAABSAN QIIMEYNTA SAAMEYNTA DEGAANKA IYO BULSHADA

WAAFAQSAN XEER-NIDAAMIYE 8(1)
ARJIGA XOGTA MASHRUUCA OO KOOBAN
MAAMUL GOBOLEEDYADA

Wasaaradda Degaanka iyo Isbeddelka Cimilada
Dhammaan waraaqaha waxaa lagu socod siinayaa wasiirka

Tixraac------------------------------ Lambarka qabashada -------------------
---Tariikh-----------------

1. Xogta mashruuca oo kooban iyo Faahfaahinta nooca iyo qeybaha shaqada.

Tilmaamaha loogu talo-galay si loo dhammeystiro xogta kooban ee mashruuca.
Fadlan la soco in dhammaan qeybaha foomka ay tahay in la buuxiyo, haddii aanay meesha banaani ku filnayn kusoo lifaaq macluumaadka dheeraadka ah (wax-ka-beddelka foomka lama oggola).

Qof kasta oo ku qora xog been abuur ah qeybta xogta kooban ee mashruuca wuxuu mutaysanayaa ciqaab, sida uu dhigayo qodobka 50aad ee Xeerka Maaraynta Degaanka, Si loo hubiyo in aanu dib-u-dhac ku imaan fulinta mashruuca, waxaa haboon in xogta kooban ee mashruuca lasoo gudbiyo xili hore.
Fadlan ogow, haddii hay'adda Dawladda ee ku shaqada leh go'aamiso in mashruucu u baahan yahay qiimayn gun-dheer, faahfaahinta khubarada mas'uulka mashruucu soo jeediyey iyo shahaadada mihnadooda Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada, waa inuu u gudbiyaa

hay'adda Dawladda ee ku shaqada leh ka hor inta aan Qiimeynta degaanka iyo bulshada la sameyn.

QEYBTA A

Faahfaahinta codsadaha:

1. Magaca mashruuca ---------------------
2. Qarashaadka mashruucu ku kacayo ---------------------
3. Milkilaha mashruuca ----------------------
4. Cida lala xiriirayo ------------------------
5. Lambarka Boostada -----------------------
6. Meesha uu degan yahay/tahay ---------------------
7. Telefoonka ------------------
8. Email-ka --------------
9. Meesha mashruuca laga fulineyo (khariidad tusaysa goobta mashruuca laga fulineyo) ----------

QEYBTA B,

1. Faahfaahinta mashruuca
   a. xog kooban oo ku saabsan mashruuca;
   b) waa maxay heerka ama baaxda mashruucu; iyo
   c) waa maxay cimriga mashruucu amaba sida la odarasayo intee buu jiri karaa.

2. Habka mashruucu u shaqeyn doono (raaci lifaaq jaantus tusaya habka mashruucu u shaqeyn doono, raaci sawir meesha ku habboon)

   a) waa maxay agabka/qalabka shaqada lagu isticmaali doono ay ku jiraan kuwa xiliga dhismaha; iyo
   b) waa maxay nooca wax soo-saarka iyo haraadiga wax soo-saarka oo ku jiraan qashin ka soo baxay shaqada wax soo-saarka.

3. Qorshaha mashruuca:
   a) mashruuca miyaa dhul la siiyey? (raaci lifaaqa waraaqaha cadeynta dhulka);
   b) waa sidee xilligan isticmaalka/ ka-faa'ideysiga dhulka mashruuca la siiyey?;

c) ma laga yaabaa in mashruucu dhul beddel u baahdo?; iyo
d) adeegyada hoos ku xusan miyaa laga helaa meesha mashruuca laga fulineyo?:
   i. waddo --------(faahfaahi);
   ii. biyo ----------(faahfaahi);
   iii. koronto -------- (faahfaahi);
   iv. isgaarsiin -------------- (faahfaahi);
   v. habka maareynta wasakhda dareeraha ah ee magaalooyinka ---- -------------------------------------------(faahfaahi);
   vi. maareynta qashinka ----------------------------- (faahfaahi); iyo
   vii. hadii ay jiraan adeegyo kale --------------------------- (faahfaahi).

e) mashruucu ma sababi karaa barakac dad iyo mid hantiyeed?; Hadii jawaabtu tahay haa (imisa qoys ayaa ku barakacay)?;
f) mashruucu masaafo intee la eg ayuu u jiraa noocyada isticmaalka dhulka ee hoos ku xusan;
   i. Goobaha dadku degan yahay -----------------------------
   ii. Goobaha warshadaha ---------------------------------------
   iii. Ganacsiga ---------------------------------------------------
   iv. Dhul beereedka ----------------------------------------------
   v. Goobaha bixiya adeegyada bulshada (masaajid, Iskuul, goob loogu talo-galay in lagu tamashleeyo).

g) mashruucu miyuu ku yaalaa ama ku dhow yahay goobaha hoos ku xusan:

| **Goobta** | **Haa** | **Maya** | **Inta ay u jirto** |
|---|---|---|---|
| Seere dalxiis ama xayawaan | | | |
| Seere lagu daryeelo noolaha iyo dabeecada leh mudnaanta gaarka ah | | | |
| Dhulka qoyan ee leh mudnaanta gaar ka ah (agagaarka webiyada, baliyada, harooyinka, IWM) | | | |
| Dhulka leh biyaha sare ee | | | |

| | | | |
|---|---|---|---|
| dhulka (biyo joogta ah iyo qaar aan joogto ahayn) | | | |
| Dhulka daadadku ku biyo furaan | | | |
| Goobaha xayawaan ku tarmaan (dhigaan ukuntooda ama marka ay dhalayaan yimaadaan) | | | |
| Goobaha laga helo xayawaanka ama dhirta tirada yar ama naadirka ah (dabar-go'aya) | | | |
| Goobaha leh ahmiyada gaarka ah sida (asaarta dabiiciga ah/arkiyolijiyadda, goobaha taariikhiga ah, ahmiyada diiniga ah, iyo tan dhaqan ba) | | | |
| Goobaha xiran ee xeerarka dalka ku xusan | | | |
| Buuro yaryar | | | |

QEYBTA C,

1. Si kooban u qor Saameynta mashruuca ee suurta-gal ka ah ee uu ku yeelan karo degaanka (noocyada noolaha ee kala duwan, dhaqaalaha iyo bulshada), ee dhinacyada kala ah:

   a. Dhibaatada ka dhalan karta (Saameyn taban) ------------------
   ------------------------------------------------------------------
   ------------------------------------------------------------------
   ------------------------------------------------------------------
   ---------------------------

   b. Faa'idada ka dhalan karta (Saameyn togan) --------------------
   ------------------------------------------------------------------
   ------------------------------------------------------------------
   ------------------------------------------------------------------
   --------------------------

   c. Talaabooyinka la qaadayo si looga hortago dhibaatooyinkaas
   ------------------------------------------------------------------
   ----------------------------------------------------------

   d. Qor wixii faahfaahin dheeraad ah ee naga caawin kara in aanu mashruuca go'aan ka gaarno.

QEYBTA D,

Aniga oo ah ------------------------------------------------- waxaan cadeynayaa in xogta aan bixiyey tahay mid sax ah, oo run ah inta aan ogahay.

Saxiix ---------------------------------------------------------------------------

Taariikhda ---------------------------------------------------------------------

WAAFAQSAN XEER-NIDAAMIYAHA 11(4)
ARJIGA FAAHFAAHINTA DARAASADDA QIIMEYNTA SAAMEYNTA DEGAANKA IYO BULSHADA

Arjiga faahfaahinta daraasaddu wuxuu si cad u iftiimineyaa dhammaan arrimaha ay ka kooban tahay daraasaddu, wuxuu sidoo kale cadaynayaa baaxadda shaqada daraasadda, Xogta arjigan faahfaahinta daraasadd ku qoran waxaa loo adeegsan karaa in wax lagu fahmo “tusaale kaliya”. Maadaama noocyada mashaariicda iyo milkileyaashooduba kala duwan yihiin, arjiga faahfaahinta daraasadduna wuu kala duwanaanayaa.

Waxaa loo baahan yahay in arjiga faahfaahinta daraasaddu si fiican u sheegto baaxadda daraasaddu qiimeynta degaanka, iyo jadwalka shaqada si ay ula jaan-qaado diyaarinta, qorsheynta iyo fulinta mashruuca.

Dhammaan shaqooyinka ay daraasaddu ka koobnaanayso waa in si fiican loo faahfaahiyaa, ugu yaraana waa iny ku jiraan waxyaabaha hoos ku xusan:

1. Faahfaahinta siyaasadaha iyo xeerarka Dalka ee mashruuca khuseeya;
2. Faahfaahinta xaaladda degaanka shaqada laga fulinayo ku sugan yahay (noocyada noolaha ee kala duwan iyo ma noolaha)
3. Xaaladda dhaqan dhaqaale ee bulshada (xilligan iyo mustaqbalka dhawba);
4. La-tashiga dadweynaha si ay uga ra’yi dhiibtaan;
5. Gorfeynta iyo ka baaraandega xalalka suurta-galka ah;
6. Odoroska Saameyn kasta oo suurta-gal ah taas oo ka dhalan karta mashruuca;
7. Soo-jeedinta xalalka suurta-gal ka ah (arjiga faahfaahinta daraasadu waa in uu si fiican u sheegaa in khubarada daraasadd wada laga rabo iney soo jeediyaan xalalka ugu haboon ee suurta galka ah, isla markaana ku kacaaya kharash macquul ah iyada oo mar walba la hubineyo in xalka la qaadanayaa yahay ka ugu haboon ee yareynaya Saameynta/dhibaarada la odorosay);
8. Qorshe cad oo lagu fulinayo dhammaan xalalka habboon ee la doortay/qaatay si looga hortago iney dhacaan Saameynta taban

(dhibaatada) suurta-gal ka ah ee la saadaaliyey (arjiga faahfaahintu waa inuu sheegaa shaxda rasmiga ah ee loo adeegsanayo marka la sameynayo qorshaha cad ee kor ku xusan, sidoo kale, waa inuu sheegaa sidii qorshaha daba-gal loogu sameyn lahaa iyo dhinacyada doorka ku leh mas'uuliyadda fulinta)

9. Saameynta asaarta qadiimiga ah (Archaeological);
10. Warbixinta daraasadda Qiimeynta Saameynta degaanka iyo bulshadu waa inay noqotaa mid kooban oo macno leh, tusaysa dhammaan Saameynaha suurta-gal ka ah.

## WAAFAQSAN XEER-NIDAAMIYAHA 13 (2)
## QEYBAHA AY KA KOOBAN TAHAY DARAASADD QIIMEYNTA SAAMEYNTA DEGAANKA IYO BULSHDA

Ujeeddada Xeer-nidaamiyuhu waa inuu bixiyo macluumaadka asaasiga ah iyo kan ugu yar ee ay tahay inay ku jirto warbixinta Daraasadda Saameynta Qiimeynta Degaanka iyo Bulshada. Warbixinta waa inay ku jirtaa dhammaan xogta loo baahan yahay sida ku cad xeerka. Sidaa daraadeed, qaabka iyo qeybaha ay daraasaddu ka kooban tahay waa inay noqdaan sidan hoos ku xusan:

1. Faahfaahin dhamaystiran oo ku saabsan milkilaha mashruuca iyo khubarada daraasadda sameynaysa. Xogta waa inay ku jirtaa lambarka boostada, telefoonka, iyo Email-ka oo ay tahay in lagu qoro xaga sare ee warbixinta.
2. Gogol-dhigga warbixinta daraasadda (xog kooban oo ku saabsan warbixinta, mashruuca, meesha mashruuca laga fulinayo, milkilaha mashruuca, xeelada iyo farsamada la adeegsaday si daraasaddan loo sameeyo, Saameynta mashruuca ee la odorosay, xalalka suurta-gal ka ah, talo soo-jeedinta khubarada iyo gunnaanad ka warbixinta.
3. Hordhaca warbixintu waa inay faahfaahisaa mashruuca iyo nooca uu yahay, meesha laga fulineyo. Haddii mashruucu qeyb ka yahay mashaariic wadajirta waa in la qoraa xogta asaaska mashruuca iyo asbaabaha keenay.
4. Siyaasadda, xeerarka, Xeer-nidaamiyeyaasha, qorsheyaasha iyo hageyaasha la xiriira mashruuca, ee ay tahay in loo hogaansamo mar walba waa in si faahfaahsan loo qoraa.
5. Xogta faahfaahinta mashruuca waa inay ku jiraan wax yaaban hoos ku xusan:
    i. ujeeddada mashruuca;
    ii. heerarka mashruucu marayo (ka baraandegga suurta-gal nimada mashruuca, naqshadda iyo Qiimeynta Injineerka oo faahfaahsan, fulinta iyo dhammeystirka);

iii. khariidad tusaysa goobta mashruuca laga fulineyo;
iv. naqshadii bilowga (hadii ay jirto) ee dhismeyaasha iyo baaxadda horumarka;
v. muddada uu qaadanayo dhismuhu iyo xiliga la filayo in lasoo gabo-gabeeyo;
vi. Gaadiidka la isticmaalayo iyo jidadka ay marayaan;
vii. Fahamka guud ee hawl-galka mashruuca;
viii. Noocyada iyo xadiga walxaha (ashyaada) la isticmaalayo; iyo
ix. Noocyada, xaddiga, isku-dhiska, haraadiga wasakhda iyo qorshaha lagaga hortagayo ama loo maaraynayo.

6. Xaaladda degaanku ku sugan yahay ee dhinacyada kheyraadka noolaha (dhirta iyo xayawaanka) dhaqan dhaqaalaha bulshada, iyo dhulka waa in la diiwaan-geliyaa/qoraa si loo isticmaalo xilayada danbe marka la sameynayo is-barbar dhig ku saabsan xaalka degaanku ku sagan yahay hadda iyo ka hor intii aan mashruuca la fulin.

7. Qeybtani waa inay ka hadashaa ujeeddada laga leeyahay la-tashiga dadweynaha, habka loo maray, iyo miraha ka dhashay (Scooping), waxaa sidoo kale loo baahan yahay in la xuso habka iyo xiliga, xeeladaha la isticmaali doono marka la sameynayo la-tashi dadweyne xiliga daraasadda Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada (ESIA).

8. Qeybtani waa qeybta ugu muhiimsan daarasadda Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada (ESIA), waa inay ka hadashaa dhammaan Saameyn kasta (dhib) oo suurtagal ah iney dhacdo xiliyada lagu gudo-jiro qeybaha mashruuca sida sahaminta, dhismaha iyo dhamaystirka ama gabo-gabada, taasoo fure u ah in la helo xal suurta-gal ah oo lagaga hortagayo. Faahfaahintan hoos ku xusan waxay tusaysaa astaamo ay leedahay saamaynta degaanka iyo tan bulshadu.

i. saameynta fiican ama faa'idada bulshadu heli karto (togan) iyo dhibaatada ka soo gaari karta (taban) marshruuc;
ii. saameynta toos ka ah iyo tan dadban ee ka dhalatay mashruuca, had iyo goor way fududahay in la garto Saameynta toos ka ah sida barakac dadweyne, laakiin, way adag tahay in Saameynta aan toos ka ahayn la garto;
iii. saameynnada (dhibaatooyinka) soo noqnoqda iyo kuwa mar kaliya dhaca;

iv. kuwa Saameynaya dhul kooban iyo Saameynnada u gudbaya dhul balaaran oo baaxad leh ama gobollo;
v. kuwa haraadigoodu marka uu isbiirsado ay ka dhalan karto dhibaato weyn iyo kuwa aanu haraadigoodu isbiirsan; iyo
vi. kuwa gaysan kara dhibaatada baaxadda leh ee aan laga soo waaqsan karin iyo kuwa aan lahayn Saameyn sii ridan ama weyn.

9. Waxaa jira Saameynno ka gudba xuduudaha caalamiga ah iyo kuwa aan ka gudbin, sidaa daraadeed, waxaa loo baahan yahay in daraasaddu ay eegto saameynnada ka gudbi kara.

10. Falan-qeynta xalalka suurta-galka ah: qorsheynta maal-gashiga la soo-jeediyey, goobta, tiknoolajiyada iyo hababka hawl-gelinta waa in si nidaamsan loo barbardhigo Saameynta ay yeelan karaan, kharashka ay ku kacayaan marka ugu horaysa ee la hawl-gelineyo iyo korjoogtada ay u baahan yihiin, la qabsiga/la jaan-qaadka degaanka laga shaqeynayo iyo hay’adaha qaabilsan, tababarrada iyo kormeerka.

11. Tallaabooyinka lagu yareynayo dhibaatada/Saameynta mashruuca, waxaa loogu talo-galay in tallaabooyin la qaado si loo hubiyo in bulshadu ka faa’ido isla markaana wax dhibaato ah oo weyni aanu dhicin, faa’idooyinka laga helayo:

i. helitaanka habab kala duwan oo lagu fuliyo mashruuc iyadoo la hubineyo inaan wax dhibaata ah oo weyni degaanka soo gaarin;
ii. baabi’inta ama yareynta Saameynta/dhibaatada ka dhalata fulinta mashruuca iyo balaarinta faa’idada bulshadu helayso;
iii. In la ilaaliyo xaqa ay xubnaha bulshadu ama guud ahaan bulshadu u leedahay magdhowga;
iv. sahminta mashruuca iyo tallaabooyinka kharash ahaan suurtagal ka ah waa in la isticmaalaa si loogu yareeyo dhammaan dhibaatooyinka ka imaan kara fulinta mashaariicda inta ugu badan ee suurtagal ka ah. Tallaabooyinkaa waxaa ka mid ah kharash lagu fuliyo iyo mid lagu daboolo kharash ka soo noqnoqda, iyo tababaro la siinayo hay’adaha ku shaqada leh si ay waajibkooda u gutaan;
v. dib-u-hagaajinta meelaha ay dhibaatadu soo gaartay;

vi. Dib-u-soo-celinta degaan dhibaato hore usoo gaaray sidii sii hore iyadoo la isticmaalayo farsamada injineerrada oo heer sare ah; iyo
vii. Magdhow in la siiyo dad dhibaato ka soo gaartay mashruuc sida dad barakacay ama waayey ilihii dhaqaale ee ay ku maareynayeen noloshooda.

12. Qiimeynta aasaarta Qadiimiga ah; Saameynta mashruuc ku yeeshay ama dhibaatada ka soo gaaray aasaarta dabiiciga ah iyo talo-bixinta khubarrada waa in si faahfaahsan loo sharaxaa iyadoo la tixraacayo liiska Saameynnada iyo talo-bixinnada.

13. Qorshaha fulinta tallaabooyinka lagu yareynayo dhibaatada degaan iyo tan busho ee ka dhalan karta mashruuc; qorshuhu wuxuu qeexayaa cid waliba mas'uuliyadda ay qaadanayso, dhaqaalaha loo baahan yahay iyo waqtiga la fulineyo, mid ka mid ah qeybaha qorshaha ugu muhiimsan waa qorshaha daba-galka, kaas oo lagu hubineyo in qorshuhu si fiican u hirgalay iyo in kale, sidoo kale wuxuu sahlayaa in la ogaado in loo hogaasamay hageyaasha, heerrarka mashruuca iyo xeerrarka dalka. Qorshuhu wuxuu kale uu taabanayaa in la laga digtoonaado inaan wax dhibaato ahi aanay degaanka soo gaarin xiliga mashruucu dhamaado, wixii waxyeelo ah ee dhacay intii shaqadu socotayna la hagaajiyo.

14. Gabagabada iyo talo-bixinta; waxaa loo baahan yahay in warbixinta Qiimeynta Saameynta degaanka iyo bulshadu yeelato gabagabo iyo talo-bixin si fiican loo qoray, iyadoo hadalka la soo ururineyo, gabagabadu waxay taabanaysaa xeeladda iyo farsamada la adeegsaday, Saameynta/dhibaatada suurta-galka ah ee mashruuca, iyo tallaabooyinka la qaadi karo si looga hortago dhibaatooyinkaasi inay dhacaan.

15. Tixraac; waxaa laga maarmaan ah in warbixintu yeelato liis ay ku dhan yihiin dhammaan tixraacyada meelaha laga soo qaatay xogta.

16. Lifaaqyada; qoraalada muhiim ka ah ee aan warbixinta guud ka midka ahayn, lakiin hadhow loo baahan karo si ay khubarada u tixraacdo waxaa laga dhigayaa lifaaqa warbixinta. Liiska lifaaqyada;

a) Arjiga faahfaahinta Qiimeynta Saameynta degaanka iyo bulshada;
b) Ilaha xogta iyo macluumaadka laga helay;

c) Liiska dhammaan dadka iyo xafiisyada lalatashaday waqtigii daraadasada Qiimeynu socotay;
d) Xogta la soo ururiyey muddadii daraasadu socotay;
e) Xogta ku saabsan asaarta qadiimka ah ee la soo helay;
f) Xogaha badan ee la helay muddadii daraasaddu socotay, taas oo aan badan keedu waxbixinta lagu dari karin maadaama oo ay aad u faahfaahsantahay, sida naqshada dhismaha, sawirada, khariidadaha, dikhowga degaanka, caro-guurka, baahiyaha adeegyada bulshada;
g) Xog kooban oo ku saabsan la-tashigii dadweynaha, waxaa loo baahan yahay qoraalka laga qoray (meeting minutes) shir walba oo dadweynaha lala yeeshay; iyo
h) Magacyada, xogaha waayo-aragnimada (CV), iyo macluumaadka kale ee loo baahdo.

F.G:
Inta ay la eg tahay faahfaahinta xogta ee la helayaa waxay ku xiran tahay hadba inta Saameynta/dhibaatada mashruuca uu keeni karo ay la eg tahay iyo tallaabooyinka la qorsheeyey.

JADWALKA AFARAAD
KHUBARADA QIIMEYNTA SAAMEYNTA DEGAANKA IYO MASHRUUCA

WAAFAQSAN XEER-NIDAAMIYAHA 47(1)
AQOONTA LOOGA BAAHAN YAHAY KHUBARADA QIIMEYNTA SAAMEYNTA DEGAANKA IYO BULSHADA, IYO DEGAAN DHAWREYAASHA HUBINEYA IN LOO HOGAANSAN YAHAY XEERRAR KA IYO HAGEYAASHA

1. Khubarada danaynaysa inay sameeyaan/qabtaan shaqada Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada ee mashaariicda, qorsheyaasha iyo hubinta u hogaasan ka xeerrarka iyo hageyaasha dhawrida degaanka waxaa looga baahan yahay haday yihiin muwaadiniin ama ajanabi iney iska diiwaan-galiyaan Wasaaradda Degaanka iyo Isbadelka Cimilada.

2. Ka dib marka ay buuxiyaan shuruudaha hoos ku qoran, khubarada muwaadiiniinta ah iyo shisheeye, saraakiisha sare, saraakiisha dhexe iyo shirkaduhu waa iney bixiyaan qarashaadka ku waajibay, iyagoo ku bixinaya canshuuraha Berriga ee Wasaaradda Maaliyadda, ka dibna dhammeystirka diiwaan-gelinta iyo oggolaanshaha rasmiga ah ka qaadanaya Wasaaradda Degaanka iyo Is-beddelka Cimilada.

3. Shuruudaha diiwaan-gelinta khubarada:
   a) Sarkaal sare (Khabiirka hogaamineya daraasadda Qiimeynta);

   b) Sarkaalka sare waa inuu leeyahay aqoonta hoos ku xusan;
   c) Waa inuu haystaa shahaaddada heerka labaad ee jaamacadeed, taas oo la xiriira shaqada laga shaqeynayo, sidoo kale, waa inuu leeyahay ugu yaraan 5 sano oo waayo-aragnimo ah oo la xiriira Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada ah, cilmi-baarista iyo tababarrada;
   d) Qarashaadka diiwaan-gelinta sarkaal sare –khabiirka muwaadinka ah (40 Doolar) qarashaadka diiwaan-gelinta sarkaal sare – khabiirka shisheeyaha ah (100 Doolar).
   e) Sarkaal dhexe (kaaliyaha khabiirka hogaamineya daraasadda Qiimeynta);

   f) Sarkaal xigeenku waa inuu leeyahay aqoonta hoos ku xusan. Waa inuu haystaa shahaaddada kowaad ee heer jaamacadeed, taasoo la xiriira shaqada laga shaqaynayo, ama waa inuu haystaa heerka wax barasho ee DIBLOOMADA iyo tababaro farsamo oo ku saabsan Qiimeynta Saameynta degaanka iyo bulshada.
   g) qarashaadka diiwaan-gelinta sarkaal xigeenka –khabiirka muwaadinka ah (30 Doolar);
   h) qarashaadka diiwaan-gelinta sarkaal xigeenka– khabiirka shisheeyaha ah (70 Doolar).

   A. Shirkada rabta inay noqoto mid ku takhakhustay Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada

Shirkadu waa inay buuxisaa shuruudaha hoos ku xusan:
   1. Waa inay noqotaa shirkad ka diiwaan-gashan dalka Somaliya;
   2. Waa inay xogta shirkada ee tusaysa awooddeeda farsamo, maamul, iyo khubaradeeda u gudbisaa Wasaaradda Degaanka iyo Is-bedelka Cimilada;

   3. Sarkaalka sare ee iska diiwaan-geliyey Wasaaradda Degaanka iyo Is-bedelka Cimilada waa inuu haystaa shati muddadiisu aanu dhicin, kaas oo shaqaynaya;

4. Shirkada ay leeyihiin dadka ajaanibka ahi, waa inay shaqaaleysiiyaan khubarada muwaadiniinta ah.

Qarashaadka diiwaan-gelinta shirkada ay leeyihiin –khabiirka muwaadinka ah (60 Doolar)
Qarashaadka diiwaan-gelinta shirkada ay leeyihiin – khabiirka shisheeyeah (180 Doolar).

B. Codsiga dib-u-cusbooneysiinta shatiga mihnada Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Is-bedelka Cimilada.

Ka dib marka ay khubaradu iska diiwaan-geliyaan Wasaaradda Degaanka iyo Is-bedelka Cimilada waa inay codsadaan shatiga mihnada Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada, kaas oo dib loo cusbooneysiineyo sanadkiiba hal mar.
Shuruudaha dib-u-cusbooneysiinta

1. Waa in la bixiyaa qarashaadka ku waajibay, waraaqda lacag qabashadana la keenaa.
2. Nuqul ka shatigii sanadkii hore ama shahaaddada diiwaan-gelinta shirkada.

Qarashaadka dib-u-cusbooneysiinta:

| **Nooca** | **Muwaadin** | **Shisheeye** |
|---|---|---|
| Sarkaal sare khabiirka hogaamineya daraasadd Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada | $50 | $200 |
| Sarkaal xigeen –kaaliyaha khabiir ka hogaamineya daraasadd Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada | $40 | $100 |
| Shirkad ku takhakhustay Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada | $240 | $720 |

Wasaaradda Degaanka iyo Isbedelka Cimiladu waa iney xaqiijisaa inuu helay arjiga codsiga 14 maalmood guddahood, islamarkaana uu ku bixiyaa shatiga mihnada Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada 45 ilaa 90 maalmood gudahood si waafaqsan Xeerka Maaraynta Degaanka.
Waajibka macmiilka

Waxaa fiican oo u habboon in milkilaha mashruucu inuu codsado shahaaddada bad-qabka degaanka iyo bulshada (ESIA Licence) 90 maalmood ka hor waqtiga la qorsheeyey inuu bilaabmo mashruuciisu
Milkilaha waxaa looga baahan yahay inuu bixiyo qarashaadka ku waajibay
Waa inuu soo gudbiyaa dhammaan waraaqaha looga baahan yahay xili hore
Khubarada sameynaysa Qiimeynta Saameynta degaanka waxaa looga baahan yahay inay si fiican u shaqadooda u gutaan iyaga oo isticmaalaya xog ama macluumad dhab ah.

C. Waxbarashada jaamacadeed ee khusaysa Qiimeynta Saameynta Degaanka

Daraasadda degaanka, cilmiga noolaha (bayuulojiga), kiimikada, injineeriyada (shibil, beeraha, biyaha, iyo kiimikada), juqraafiga, cilmiga dhulka, cilmiga noolaha il-ma-qabatada cilmiga dabiiciga, degaanka, daraasadd dhaqanka bulshada, sharciga degaanka ama kuwa kale oo ay ansixiso hay'ada iyadoo raaceysa soo-jeedinta hay'ad ku foogan arimaha degaanka ama xeel-dheere.

HUBIN
Ka dib marka codsiga la helo, codsadaha waa loo yeeri karaa si loola yeesho waraysi gaara, ama laga hubiyo waraaqaha iyo xogta uu soo gudbiyey
Sii horumarinta aqoonta
Waxaa looga baahan yahay in khabiir waliba uu sanadkii qaato ugu yaraan hal tababar oo ah kuwa ay soo qabanqaabiyaan ururada ay ku midoobeen khubarada arrimaha degaanku iyadoo lala tashanayo Wasaaradda Degaanka iyo Isbedelka Cimilada si ay u ansixiso xubnaha ku jira liiska ururka.

WAAFAQSAN XEER-NIDAAMIYAHA 49 (2)

ANSHAXA LOOGA BAAHAN YAHAY KHUBARADA IS DIIWAAN-GELISAY

SI WAAFAQSAN XEERKA

Khubaradu waa inay shaqadooda u gutaan sida ugu fiican ee suurta-gal ka ah ee waafaqsan mabaadiida caalamiga ah ee dhawrida degaanka iyo horumarka waara, waxaa kale oo loo baahan yahay in la raaco xeerrarka dalka, lana hubiyo in la sameeyo shaqo heer sare ah.

1. Khubarada sameynaysa daraaasada Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada waxaa looga baahan yahay in wax walba ka horaysiiyaan mudnaanta ilaalinta degaanka, caafimaadka iyo mabaadiida yoolka horumarka waara.
2. Khubarada sameynaysa daraaasada Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada waa inay tixgalin dheeraad ah siiyaan arrimaha khuseeya ilaalinta degaanka ee la xusay xiligii mashruuca la diyaarinayey.
3. Khubaradu waa inay shaqadooda u qabsadaan si daacadnimo ah, kana dheeraadaan wax isweydaarin, been iyo musuqmaasuq.
4. Khubaradu waa inay si fiican warbixintooda ugu kala saaraan ra'yiga dadweynaha iyo arrimaha xaqiiqada ah.
5. Khaburadu waa inay u dhego nuglaadaan oo ay la socdaan horumarka cilmiga ku saabsan Qiimeynta Saameynta degaanka, kaas oo maalinba maalinta ka danbaysa soo kordhaya, ka dibna, waa iney aqoonta ay helaan ku dabaqaan shaqadooda.
6. Khubaradu waa iney ku wargeliyaan loo shaqeeyaha wax kasta oo kala shaki keenaya, taas oo dhaawici karta qiimaha iyo qaayaha shaqada.
7. Khubaradu waa iney si fiican u isticmaalaan oo ay uga faa'ideyaan xogta la heli karo.
8. Khubaradu waa iney qaadaan mas'uuliyada macluumaadka ay warbixin tooda ku soo saareen, laakiin, mas'uul kama aha go'aan ka cid kale ay qaadato.
9. Khabaradu waa in qabtaan/sameeyaan Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada ee ay aqoon iyo waayo-aragnimo ku filan u leeyihiin.
10. Khubaradu waa in aanay xayeysiin shaqada ay bulshada u qabanayaan si aanay u dhaawicin qiimahooda iyo kalsoonida lagu qabi karo.
11. Khubaradu waa in aysan been ka sheegin heerkooda aqoonta iyo waayo-aragnimadooda shaqo iyo ta kaaliye-yaashooda midna, sidoo kale waa in aysan buunbuunin shaqada ay qabanayaan. Marka laga dalbado inay soo gudbiyaan codsigooda shaqo/qardaraas waa inay si habboon oo tafatiran u soo gudbiyaan.
12. Khubaradu waa in aysan isticmaalin warbixinaha Qiimeynta Saameynta Degaanka ee dadka kale, iyagoo aan oggolaansho ka helin.
13. Khubaradu waa inay ku ekaadaan ujeeddada Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada, kuna dedaalaan sidii ay u gaari lahaayeen.

FOORMKA TODOBAAD,

XAASHIDA DIIWAAN-GELINTA KHUBARADA SAMEYNEYSA DARAASADDA QIIMEYNTA DEGAANKA IYO BULSHADA

| No. | Magaca Khabiirka | Lambarka diiwaan-gelinta | Lambarka shatiga mihnada | Email-ka iyo Telefoonka | Takhakhuska |
|---|---|---|---|---|---|
| 1. | | | | | |
| 2. | | | | | |
| 3. | | | | | |